# Collection Information:

**Item:** Somali transcript of oral history interview with Abdiaziz Osman, June 21, 2014. / Qoraalada asalka ah ee laga sameeyey wareysiyada afka Soomaaliga.

**Collection:** Somalis in Minnesota Oral History Project. Oral History Interviews of the Somalis in Minnesota Oral History Project.

# Copyright Notice:

© 2016 Minnesota Historical Society

Researchers are liable for any infringement. For more information, visit www.mnhs.org/copyright.

Version 2
December 6, 2016

**Abdiaziz Osman**
**La wareyste**

**Ahmed Ismail Yusuf**
**Wareyste**

**Juun 21, 2014**
**Minneapolis, Minnesota**

**Qoraalada asalka ah ee laga sameeyey wareysiyada afka Soomaaliga**[1]

Abdiaziz Osman **-AO**
Ahmed Ismail Yusuf **-AY**

**AY:** Waa bisha Juun 21 keeda, waxaana joognaa oo ku sugan nahay magaalada Minneapolis ee gobolka Minnesota. Anigu waxaan ahay Axmed Ismaaciil Yuusuf oo u qabanaya wareysigan Minnesota Historical Society. Halkan waxaa ila jooga oo I weheliya Cabdicasiis Cusmaan. Waxaanu doonaynaa in aanu wareysigan ku qaado afka Soomaaliga. Cabdicasiis ku soo dhawow wareysiga.

**AO:** Mahadsanid.

**AY:** Waxaad ii sheegtaa magacaaga sidii hadii aynu rabnaba ay Soomaalidu raaci jirtay oo sedaxan.

**AO:** Magacayga waxaa la yiraahdaa Cabdicasiis Daahir Xaaji Cusmaan.

**AY:** Oo markaa waxaad isticmaashaa Cabdicasiis Cusmaan.

**AO:** Cabdicasiis Cusmaan…

**AY:** Cabdicasiisow goormaad dhalatay?

**AO:** Dhalashadayda ii qorani waa 9/25/44.

**AY:** Halkee baad ku dhalatay?

**AO:** Muqdisho, Xamar baan ku dhashay.

**AY:** Waa gartay, markaa adiga taada waan u so noqonayaa. Aabe iyo hooye xagee bay igu ku dhasheen? Maxaase magacyadooda la oran jiray?

[1] English translation is also available.

**AO:** Aabe waxaa la yiraahdaa Daahir Xaaji. Hobyo ayuu ku dhashay.

**AY:** Hobyuu ku dhashay. Hoyo xagee iayana ku dhalatay?

**AO:** Hooyo iyadu baadiyey ku dhalatay.

**AY:** Baadiyey ku dhalatay. [qosol]

**AO:** Ma xasuusti, yaah.

**AY:** [qosol] Haye, Hobyo magaalo da' weyn weeye. Markaa adigu ma tagtay Hobyo?

**AO:** Waligay ma tagin aniga Bari oo dhanba. [qosol]

**AY:** Muqdishaba malaha xagaa u maad dhaafin.

**AO:** Moqdisho, Gaalkacyo bas iyo Kismaanyo.

**AY:** Gartay. Gaalkacyo waad gaadhay?

**AO:** Gaalkacyo waa gaaray, haa.

**AY:** OO xaga kale Koofurta laftigeeda Kismaanyo yaad gaadhay?

**AO:** Duqa aabahay ah ayaa wuxuu ka ahaa gubarnatoore. 1958, yaah.

**AY:** Markaa aan Aabe in yar taariikhdiisa ka sheekayno.

**AO:** Haa, duqa wuxuu ka mid ahaa 13 kee Leegayda. Soomaaliya, yaah.

**AY:** 13 kii buu ku jiray SYL.

**AO:** Haa, wuxuu ahaa, qofkii ugu dambeeyey oo dhintay ma ahayn, laakiin…

**AY:** Dhawaan buu dhintay.

**AO:** Dhawaan buu dhintay, haa.

**AY:** Goormuu dhintay?

**AO:** Adiga wuxuu dhintay 2008 kii meelahaas haa.

**AY:** Xaguu ku dhintay?

**AO:** Wuxuu ku dhintay Qardho, Soomaaliya.

**AY:** Waan gartay, imisaad markaa walaalo ahaydeen?

**AO:** Todobo yaanu ku ahayn walaalo. Labo gabdhood iyo shan wiil. Yaah!

**AY:** Markaa hadii aynu aabe dib ugu noqono, aabe ma nin wax is baray buu ahaa oo dee quraan dugsigii iyo dee dadkii xiligii joogay xiligaa iskuulana ma ay jirin, iyagaa.

**AO:** Mayee duqa, horta hore waagaa waqtigiisii… Waxaa jiray ma taqaanaa Ingiriiskaa wadanka maamulahayey. Yaah, Talyaani ma joogin.

**AY:** Waa gartay waa dagaalkii labaad dabayaaqadiisii.

**AO:** Waa dabayaaqadiisii.

**AY:** Markaa gabigiisaba waxaa wada haystay Ingiriis.

**AO:** Waa Ingiriis.

**AY:** Waan gartay.

**AO:** Markaa asagu wuxuu ahaa Karaani.

**AY:** Karaani buu ahaa.

**AO:** Karaani buu ahaa. Markaa dadkaa wuxuu ahaa nin teebka iyo hadii heerka waagaas loo fiiriyo.

**AY:** Haa.

**AO:** Nin horey u maray buu ahaa. [qosol]

**AY:** Xiligaa wuxuu ahaa nimankii mutacalimiintu ahaa.

**AO:** Mutacalimiintuu ahaa [qosol] dadkii hore hadii loo fiiriyo.

**AY:** Dhabaqada dhexe ayuu ahaa.

**AO:** Waagaa sayto haa.

**AY:** Nin mutacalim ahna wuu ahaa oo la yaqaan.

**AO:** Nin mutacalim ah wuu ahaa.

**AY:** Laakiin iskuulo gaar ah oo uu ka soo baxay ma ay jirin.

**AO:** Jaamacadi ma jirin.

**AY:** Jaamacadi ma jirin, een markii aad adigu markaa garaadsatay Moqdishoo maxay kula ahayd? Nolosho siday ahayd?

**AO:** Yaah, horta hore duqa aabahay ah Gaalkacyo wuxuu ka ahaa Gubarnatoore. 1957 kii.

**AY:** Waan gartay.

**AO:** 1958 kiina Kismaanyo. ’58 kii ka dib waxaa loo soo bedelay Xamar. Yaah. Markaa Xamar baanu waxaanu degnay xaafadaha ugu fiican oo Via Rooma iyo.

**AY:** Via Rooma.

**AO:** Xaafadaas kore oo dhinaca safaarada Ingiriiska jidkeeda.

**AY:** Haa, haa.

**AO:** Dhinacaas uun baa ku jirnay.

**AY:** Meelaha dadka madaxda uun ahi ay degaan.

**AO:** Madaxda waa garatay. [qosol]

**AY:** Waa gartay, waa gartay. Markaa noloshu xiligaa marka aad soo koraysay, nolol side ah bay kula ahayd? Ma nolol macaan bay ahayd?

**AO:** Walaahi nolol macaan oo fiican bay ahayd, hadii ma taqaanaa aadan miskiin ahan.

**AY:** Haa.

**AO:** Qoysas iska fiican baan ka dhashay. Markaa waa iska roonayd noloshu.

**AY:** Noloshu nolol dabacsan bay ahayd.

**AO:** Nolol fiican o dabacsan bay ahayd, yaah.

**AY:** Markaa waxyaabaha yididiilada – yididiiladii idiin muuqatay xiligaa intaad xornimada la gaarin.

**AO:** Haa.

**AY:** Wali caruur baad ahayd.

**AO:** Waqtigii xorimada ka hor…

**AY:** Haa.

**AO:** Hadee aabahay wuxu ku jiray dadkii halganka yaa halgamadii hore.

**AY:** Waan gartay, oo qoladii SYL ka buu ahaa.

**AO:** SYL kuu ku jiray, haa. Markaa anigu waa yaraa.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Waxna waan garanayey, barkee lix, todobo sano markaad jirtid. Wax baad garanaysaa.

**AY:** Waan gartay.

**AO:** Yaah.

**AY:** Waan gartay.

**AO:** Markaa waxaan xasuustaa inuu yaah in Leegada saldhigeeda waad taqaanay, wuxuu ku yaalay dhinacaas Xamar-Jajab, intii la gaarin Xamar-Jajabna ma aha.

**AY:** Uh-uuh.

**AO:** Markaa ma xasuusataa meelahaas.

**AY:** Xoogaa, haa, haa baan ka garganayaa, laakiin leegada meeshay ku taalay si fiican uma garanayo.

**AO:** Markaa markuu aabahay meesha aado. Waan raaci jiray mar mar.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Markaasaan meesha tagnaayoo anigoo hade meesha qololka ay galaan ma geli Karin, laakiin meel baan istaagi jiray oo waxaan dhagaysan jiray iyaah.

**AY:** Haa, waxaa meesha ka dhacaya.

**AO:** Waan xasuustaa waxa meesha ka dhacayoo, waa adigu waa meel waxaa weeye hool weyn

weeye. Buu ahaa oo kuraas iyo sidii Baarlamaanka camal.

**AY:** Een markaa adigu la socotay ma aabe uun baa iskala socotay mise meesha in uu halgan ka socdo waad garanaysay?

**AO:** Waan garanaayey wax.

**AY:** Xoogaa baad garanaysay?

**AO:** Marka in uu ma taqaanaa iney shaqadiisu taas tahay wakhtigaas. Ingiriisna wuu la shaqeyn jirey ma garatay? Waagaas laakiin Talyaani baaba soo galay wadankii.

**AY:** Haa, markii dambe waatii uu Talyaanigu soo noqday, oo Qaramada Midoobay u ku timid.

**AO:** Haa Qaramada Midoobay bu ku yimid oo dagaal wuxu uku qaaday Leegadii, ma garatay, oo ma uu rabin.

**AY:** Waayo, oo Leegadu kuwii wadanka ka saaray bay ahaayeen.

**AO:** Xoriyadii bay ka soo hor jeedeen. Marka waxaan xasuustaa, aa duma xasuusto inay in aad dhagax tuurkii in aan soo gaaray. Laakiin waxaan xasuustaa dagaal xun in uu ka dhacay Xamar oo Leegadii iyo Talyaanigii.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Oo guryahii lagaba bixi waayey.

**AY:** Xiligay ahayd ma xasuusataa.

**AO:** Laga soo bixi waayey. 54 tii miyaa ma aqaan meelahaas. Hadee waxaa ku jiray guri Isku-raran ma xasuusataa?

**AY:** Haa.

**AO:** Isku-raran baan ku jirnay guryihii ma taqaanaa Soomaalidii hore.

**AY:** Waan gartay.

**AO:** Guryihii yaah oo baraakada ahaayeen. Marka guryahaan ka fiirin jirey qof banaanka u bixi karaa ma jirin.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Bandow baa jirey.

**AY:** Waa gartay, bandow haa.

**AO:** Meel kasta bandow qof mari karaa ma jiro, marka mar kasta waxaad arkaysaa aan arki jirey dadkii Leegada ahaa. Oo halkaa wax uga iran yihiin.

**AY:** Tabeebe.

**AO:** Oo ordaaya.

**AY:** Ku xiran jirey.

**AO:** Oo dagaal…

**AY:** Uh-uuh.

**AO:** Markaa markii dambe waxaa dhacay in ma aragtay in Gawaaridii gaashaanay iyo taangiyaashii ay yimaadeen gurigii, gurigeenii.

**AY:** Gurigiinii laftigiisa.

**AO:** Haa. Ay gaaladii soo degteen iyo kuwo Soomali ah oo.

**AY:** Uh-uuh. Markaa Talyaanigii…

**AO:** Duqana gurigii ku jiray. Waa loo yimid waxaa la yiri in aad soo baxdid waaye. Waxaad haysato oo dhan soo qaado. Waa lagu wadahayaa.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Waa la waday uu adigu baabuur baa la saaray, taangiyaashuna waa daba socdeen.

**AY:** Taangiyo ayaa gawaarida lagu ilaalinayo.

**AO:** Waa lagu ilaalainayaa. [qosol]

**AY:** Maxaa markaa maskaxdaada ku jira, ma naxsan tahay?

**AO:** Waa yaabsanahay.

**AY:** Xagaa lagu wadaa.

**AO:** Xagee lagu uwadaa maxay tahay waxaani? Hadee lix jir todoba jir meelahaas baan ahayoo. Waad yaabaysaa, maxaa dhacay yaa leedahay? Todob jir yaan ahay, marka waan yaabsanaa inuu

soo noqonayo.

**AY:** Inuu soo noqonayo iyo in kale, waad aragtaa laakiin waa garanaysay iney rabshadi jirto.

**AO:** Waxaan maqlay ka dib in duqa la geeyey, halkee xageed ahayd horta hore in Bari la geeyey.

**AY:** Waan gartay, o Xamar iyo Muqdisho waa laga waday oo xeebihii yaryaraa ee waxaa la geeyey Bariga.

**AO:** Atlayno.

**AY:** Een, maxaad markaa ka xasuusan tahay gobanimadu…

**AO:** Marka markii dee gobonaimadii ay timid dee dhalinyaraan ahaynoo arday baan ahayn.

**AY:** Arday baan ahayn.

**AO:** Arday baan ahayn.

**AY:** Narkaa waxay ahayd 1960 kii.

**AO:** Haa. Raday baanu ahaynoo dugsiga dhexe meelahaas baanu ahayn baan u malaynayaa.

**AY:** Dugsi hoose.

**AO:** Dugsi hoose waa ka baxnay. Dugsi dhexe baanu ahayn, markaa, hadee waxaa socday muxuu ahaa dagaal yar yar ah. Oo xornimada loo doonaayey waa intii aan la qaadan 60 tigii wax yar ka hor. Markaa ma garatay, mudaharaad badan baa dhacay.

**AY:** Muqdisho gudaheeda.

**AO:** Haa. Ardaydii waa ka qayb galnay anagoo badan. Kuwo badan baa la qabtay ardayda. Dee markii la qaatay xornimadiina dabaal deg weyn baa dhacay, aad iyo aad.

**AY:** Dabaal degii inteed baad ka xasuusan tahay, farxadu intay le'kayd, dadka yididiiladu intay le'kayd.

**AO:** Dad isku yimid, ma garatay, waa xasuustaa. Dabaal deg weyn hadana Baarlamaanka agteeda waxaa lagu qabtay….

**AY:** Kowdii Luuliyo 1960 gii…

**AO:** Luulyo kowdeedii 1960. Wuxuu ahaa Baarlamaankii hore.

**AY:** Yaah, yaah.

**AO:** Ma xasuusataa?

**AY:** Haa.

**AO:** Baarlaankii hore agaheedaa ma taqaanaa hadee dabaal deg weyn iyo ma taqaanaa ciyaaaro iyo aduunyo iyo dhaanto iyo ma taqaanaa. Waxyaalo badan.

**AY:** Haye [qosol], ma ku dhex jirtay mise waa daawanaysay? [qosol]

**AO:** [qosol] Waa ku dhe jiray [qosol] meeshaasaan ku dhex jirayoo hadee meeshaa sida adiga aad u aragtay ma ahaynoo waa ka duwanayd saa.

**AY:** Aduunaydu waa kala duwanayd xiligaas haa ma ay ahayn sidaa.

**AO:** Waagii hore waxaa meesha saarnaa ma taqaanaa sawiro waaweyn oo libaaxyo ah iyo meel la korayd lahayd.

**AY:** Waa gartay, ayaa saarnaan jiray.

**AO:** Wixii waa la jabiyey waagi dambe ma aqaan wax dhacay yaah. Talyaanigaa dhisay waxaas oo dhan markii hore.

**AY:** Markaa waxay muddo tukubtaba…

**AO:** Dugsiga sare ayaan galay. Waagii dambe.

**AY:** Waan gartay.

**AO:** Yaah. Markii dambena waxaan u mooday adigu Talyaani am taqaanide.

**AY:** Haa.

**AO:** Mac'had la yiraa Institiyuuto.

**AY:** Institiyuuto.

**AO:** Jaamacadii ugu horeysay. Institiyuuto ee Yunifersiyaato.

**AY:** Institiyuuto ee Yunifersiyaato.

**AO:** Haa.

**AY:** Yaa la oran jiray.

**AO:** Haa.

**AY:** [qosol] Maxaa lagu baran jiray? Waa markaanu idin maagi jirnay anagu kuwayaga halkaa ka yimid ee dhinacaa kore. [qosol]

**AO:** Walaahi. [qosol]

**AY:** Dhinaca kore ee Waqooyiga.

**AO:** Reer Waqooyiga. Institiyuuto Waligaa ma maqal?

**AY:** Dee anaguna niman Ingiriis ah baanu isu haysanay. [qosol]

**AO:** Ingiriis ma gaarin. [qosol]

**AY:** Maxaa lagu baran jiray?

**AO:** Waa naga horeeyey. Aabahay baa la shaqeyn jiray ii Ingiriis buu yaqaanay waagaas.

**AY:** Haa laakiin markaa Talyaanigii baa wadanka haysta.

**AO:** Ka hor waagii Talyaanigana si fiican buu u bartay Talyaaniga Duqa, si daran buu labada afba.

**AY:** Waan gartay, markaa Jaamacad oo kalay ahayd.

**AO:** Markaa Jaamacad ay ahayd.

**AY:** Mise waxay ahayd Mac'had beeleed?

**AO:** Instiyuuyata, waxay ahayd Mac'had beeleed.

**AY:** Mac'had beeleed oo kalay ahayd. Markaa waxaa lagu baran jiray?

**AO:** Horta cilmiga aad bay ugu horeeysay, lama gaari karayn. Cilmiga Talyaani baa dhigi jiray.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Aad bay u fiicnayd.

**AY:** Maadooyinkee baa lagu dhigan jiray?

**AO:** Wax kastaa lagu dhigaayey ama Juquraafi, waxay dhigaayeen Taariikhda in kastoo Taariikhdu ay ahayd Taariikh Yurubiyan ah.

**AY:** Taariikhda, haa.

**AO:** Laatiinkaa la dhigi jiray ma garatay.

**AY:** Uh-uuh, Sayniskana.

**AO:** Xisaabta iyo Sayniska, Sayniska waxayba ahayd wax yaab leh. Baraatiko gacanta ah bay ku tusaayaan Sayniskii.

**AY:** Haa, Haa.

**AO:** Niyuutaroonkii iyo Barotaroonkii iyo wax walba. Waxa oo dhan ma taqaanaa niman oo aad u fiican waa waagaas dhigi jiray.

**AY:** Baraatikaa la idiin tusi jiray.

**AO:** Rag aad u daran. Hadee daawadana dad fiic fiican dhaqtaradii. Kii dhaqtar aadaaya in uu aad u barto. Marka cilmi ahaan way fiicnayd, yaah.

**AY:** Waan gartay.

**AO:** Aad bay u fiicnayd.

**AY:** Sidaa lagu geli jiray? Ma waxaa lagu geli jiray markaa wixii dugsi sare ka soo baxaa way geli jireen mise…

**AO:** Haa, dusgi sare.

**AY:** Mise inta ugu buundooyinka wanaagsan baa la qaadan jiray?

**AO:** Inta ugu buundada fiican baa geli jirtay.

**AO:** Baa geli jirtay.

**AY:** Musuqu siduu ahaa?

**AO:** Yaah.

**AY:** Garab ma jiray?

**AO:** Garab wuu jiray.

**AY:** Garab wuu jiray mar walba.

**AO:** Garab la'aani ma dhici kartaba, yaah. [qosol]

**AY:** Garab la'aani ma jirayso. Musuq maasuq mar walba waa jiraa.

**AO:** Bis milaahi. [qosol]

**AY:** Talyaanigaa markaa haysta, markaa maxaad ka baratay adigu?

**AO:** Waagii dambe anigu waxaan helay deeq waxbarasho. Wadanka waan ka soo tagay yaah.

**AY:** Xilimaad heshay?

**AO:** 1968 yaah.

**AY:** Baad deeq waxbarasho heshay.

**AO:** Yaan deeq waxbarasho helay.

**AY:** Xagee deeqda waxbarasho ka heshay?

**AO:** Een Talyaaniga, waxaan tagay Florence.

**AY:** Muxuu ahaa?

**AO:** Artikatakgar.

**AY:** Artikatakgar.

**AO:** Haa.

**AY:** Waa gartay, markaa halkaad ka gashay?

**AO:** Florence.

**AY:** Florence aad ka gashay?

**AO:** Florence, Itaaliya, uh-uuh.

**AY:** Maxaa Jaamacada aad gashay la oran jiray?

**AO:** Jaamacada Artikatakgar.

**AY:** Laakiin waxaan sheegayaa Jaamacada laftigeeda magaceedu waa maxay? Taasi waa maadadii soo am aha?

**AO:** May.

**AY:** Jaamacada.

**AO:** Jaamacada laftigeeda.

**AY:** Magaceedaana la oran jiray.

**AO:** Jaamacada Artikatakgar ee Florence, baa la yiraahdaa. [qosol]

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Waan tagaym hadee meeshii baan ku dhameeyey. Yaah. Markii dambe anigoo wata oo baranaaya Artikatakgar. Baan ma aragtay hadana waxaan galay Jaamacada Faan.

**AY:** Intad ku jirtay baad hada mid kale gashay.

**AO:** Intaan ku jiray baan haa. Ma garatay? Aad baan waxaan u jeclaa far shaxanka.

**AY:** Hagaag. Far shaxanka markay kugu dhalatay ee aad aragtay ina aad jeceshahay, anigu waanagii mar dhawaytana ka hadlaynay sida aynu dhinacna uga neceb nahay dhinacna uga jecelnahay.

**AO:** Haa. Far shaxanka.

**AY:** Maalintii aad aragtay in aad jeceshahay. Ma xasuusan tahay waxyaabihii kuu soo dhaweeyey.

**AO:** Waqti hore hore ahayd.

**AY:** Adigo Soomaaliya jooga.

**AO:** Anigoo Soomaaliya jooga, waan yaraa. Ma aanan ahayn Far shaxan yaqaan.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Laakiin mar kasta waxbaa kugu kicinaaya. Oo ma taqaanaa jecelka aad u qabtid. Kolkaa ku soo bixinaaya oo ma taqaanaa waxay ahayd mar hore.

**AY:** Waan gartay.

**AO:** Waagaan Isku-raran deganaa, baa gurigeena ayeyday waxay ka ijaartay nin Soomaali ah. Oo nin weyn buu ahaa waagaas, saasna uma weyn laakiin nin waagaasayto sodon jir ah.

**AY:** Haa, waa gartay.

**AO:** Waayo anigu waa yaraa, marka wuxuu sameyn jiray Iskobjaar, waagaas nin Soomaali ah oo dhooqo intuu soo qaato.

**AY:** Haa.

**AO:** Wax ka sameeynaayo anigu saanaan u fiirsan jiray waan yaabsanaa.

**AY:** Markaa tolow mi dibaduu wax ku soo bartay mise?

**AO:** Ma garanayo, midaasi waa wax ilaahi ah.

**AY:** Haye, oo waliba waa kuwi ay culumadu oran jiree hadii aad kuwaad sameysid Ikabjarka la yiraa…

**AO:** Wa kaa. [qosol]

**AY:** Waxaynu oran jirnay, dadkeenu waxaynu oran jirnay naf geli baa lagu oranayaa.

**AO:** Dadka anaga noo yimaada gurigeena oo soo booqda mise seexda waagaasayto guryaha waa la iska imaan jiray. Waxaa laga imaan jiray Gaalkacyo, waxaa laga imaan jiray korkaas ma taqaanaa iyaah.

**AY:** Haa.

**AO:** Dhinacaas Waqooyinka dadkeedu waxay imaan jireen Xamar dadkaasaa waxay oran jireen war ninkan muxuu yahay waalan baa la dhihi jiray. [qosol]

**AY:** [qosol]

**AO:** Waa mid waalan [qosol] waa lagu jiraa.

**AY:** Waa lagu jiraa iska daaya.

**AO:** [qosol]

**AY:** [qosol] Ma xasuusan tahay ma nin dibada ka yimid buu ahaa?

**AO:** Waan u malaynayaa dibad in uu ka yimid ninka.

**AY:** Intee in le'eg buu guriga joogay?

**AO:** Marka guriguu meel ka dhinac ka ijaartay qol.

**AY:** Wixiisaa suu iska malaastaa.

**AO:** Wixiisuu sameeyaa, banaanadiisuu ka soo shaqeystaa wuu soo laabtaa wixiisaa uu sameystaa. Markaa halkaasaan fakaray yaab anigii, marka dhinacaas ka soo tagba.

**AY:** Uh-uuh.

**AO:** Markaan xoogaa soo waynaaday oo dugsiyadii dhexe…

**AY:** Haa.

**AO:** Dugsigii dhexe saan u joogay baan asxaabayda, macalinka iyo ardayda wixii dhan baan masawiri jiray qalin.

**AO:** Oo markaas aad isaga feegaarayso. Haa iska sawiri jiray.

**AY:** Aad gacanta isaga sawiri.

**AO:** Haa aan gacanta isaga sawiri jiray.

**AY:** Inta dadku haaye.

**AO:** Haa dhag sidoodaan u masawiri jiray, way iga yaabi jireen, waagii dambe nin Talyaani ah oo macalin weyn ah. Yaah, oo Far shaxanka ayaa yimidoo ma taqaanaa.

**AY:** Oo markaa.

**AO:** Jirabaad weyn ayuu na siiyey.

**AY:** Ma markaad dugsiga ku jirtay baa markaasi?

**AO:** Dugsiga sare weeye. Jirabaad, waxaan ma sameyn kartaan kan geedaan sameeya waxyaabihii hore. Oo ma taqaanaa Ingiriiska. Kuwaas waa inaad sameysaan buu leeyahay.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Oo aad iyo aad u adag. Barkee saan bay u wareegaysaa. Dhinacaa waa saa. Dhinacna waa saa, adigu waa dhib badan tahay aad iyo aad.

**AY:** Waa garytay.

**AO:** Kiibaan Si sax ah ku kaanay, yaah. Markaa waagaas bay ii bilaabatay, markaan Talyaaniga tagayna. Midabyntii ugu horeeyey Florence aan ku sameeyey, yaah.

**AY:** Muxuu ahaa?

**AO:** Ka waran.

**AY:** Muxuu ahaa?

**AO:** [u/i]

**AY:** Gabar Soomaaliyeed.

**AO:** Masaajidka Arbaco Rukun ma taqaanay?

**AY:** Haa.

**AO:** Kaa saan sameeyey.

**AY:** Markaa maskaxdaad ku jirtaa wixii aad aragto in aad sameyso?

**AO:** Maya, masawir baan arkay helay. Masawirkii baan ka sameeyey yaah.

**AY:** Markaa waa wixii kuugu horeeyey?

**AO:** Kii iigu horeeyey ee midabayn aan sameeyo iyo haa.

**AY:** Haa. Haa, markii…

**AO:** Markii dambana waxaan galay magaciisii Akadeemiyada far shaxanka fiican.

**AY:** Markaa waxaan doonayaa in aan dhadhamiyo, markaad Arbaco Ruklun midabenteeda aad dhameysay.

**AO:** Haa.

**AY:** Een aad tafa tidhay ee aad aragtay in uu asagii yahay.

**AO:** Bas weeye Casiis markaan waad yaah.

**AY:** Dreeenkii baa ku kacay.

**AO:** Waxaan is iri sidani waajidka sax da ah, kani waa jidka. [qosol]

**AY:** [qosol] Markaa m waxay kula ahayd inaad guul soo hoyisay? Ma waxaad la yaabtay in waxakani quruxda ay leeyihiin mise…

**AO:** Aniga dhanba waa yaabay.

**AY:** Iney adiga kaa yimaadeen.

**AO:** Far shaxankan siduu u joogo. Irid buu furayaa ma garatay? Waa wax ma taqaanaa hadiya waaye ma garatay.

**AY:** Haa.

**AO:** Waxa ugu horeeyey sameynta inaad ku keentid weeye.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Midabaynta kaliya wuxuu taraa ma jiro. Yaah. Markaan sameeyey oo aan midabayntii ku sameeyey, midabeyntana waa in aad taqaanaa sida saxda ah ee aad u dhigaysid, yaah, waxaan iri woow. Tani waa tii iigu horeeysay, yaah. [qosol]

**AY:** Waxaan doonayaa inaan noloshayda…

**AO:** Haa. [qosol]

**AY:** Daba galaaba waatan.

**AO:** Haa aad baanba uga jeclahay Aartikargarka. Ninka midabaynta aan aad u jeclahay.

**AY:** Asagaadba ka jeceshahay.

**AO:** Aarikargar waan sameeyey, waan ku noolaaday. Laakiin markii aan iskuulka dhameeyey.

**AY:** Haa.

**AO:** Aartikargarka, hadee shaqaan waxaan ka helay meel Jasiirad ah o Sardiinya la yiraaho. Sardiin baan ka shaqeyn jiray.

**AY:** Oo aad ku shaqeyn jirtay Aartikargarka.

**AO:** Haa.

**AY:** Laakiin waxaagiina waa iska wadatay.

**AO:** Waxaygiina xagaan ku watay. Jasiiradaas.

**AY:** Waan gartay.

**AO:** Iskubjarayaal baan sameeyey oo ah niman ma taqaanaa gabayo yahano aan ka sameeyey oo sawiray.

**AY:** Oo-oo laga yaqaano wadanka Talyaaniga.

**AO:** Oo laga yaqaan Jassiirada Sardiinya, waa jasiirad.

**AY:** Jasiirad weeye.

**AO:** Oo Korsiga u dhow.

**AY:** Taswiiradooda markaas ka eegatay oo masal ka qaadatay.

**AO:** Taswiiray ii dhiibeen, markaasaan sameeyey, markaa waa inaad keentaa ma taqaaan cabiraada madaxa.

**AY:** Waxaagiiba waa is wada raacsatay.

**AO:** Intaan kaliyaa la sameynaaayaa madaxa, waxaa la rabaa qofkii dhintay qabrigiisii in la saaro, ma garatay, yaah.

**AY:** Haa madax dhig looga dhigo. Markaa siday taasi kuugu dhalatay? Ma iyagaa kula soo doontay mise adigaa bilaabay?

**AO:** Maya waxaas oo dhan waxaan ku bartay Florence.

**AY:** Waxaan ku leeyahay qaybtan nimankan gabayaaga ah.

**AO:** Haa.

**AY:** Gabay yahanada ah markaad bilowday in aad iyada sawirto oo aad midabayso.

**AO:** Haa.

**AY:** Sidaad iyaga ku heshay ma iyagaa kula soo doontay mise cid baa…

**AO:** Horta meesha Sardaanya ayaa la yiraahdaa.

**AY:** Haaheey.

**AO:** Sardaanya waa dad xoolo dhaqato ah.

**AY:** Waa reer miyi.

**AO:** Waa reer miyi, Soomaaliyaan soo xasuustay.

**AY:** Waa gartay marka waxbaynu wadaagnaa.

**AO:** Marka dad badan baan aqaanay oo aan saaxiibo la noqday. Waxay e geeyaan beer, beerna iyagu ma qabaane waxaa weeye ma taqaan xoolo. Marka waxaad arkaysaa nin dhul aan caqligaaga galayn ma taqaanaa.

**AY:** Waa iska beer weeye, waa dhul xooluhu daaqaan.

**AO:** 130 higtaar, 200 higtaar. 500 Oo waxaas daaqaaya ari iyo magaciisi iyo war sheekadaas sheeko weyn waaye, meeshaas Sardaanya la yiraahdo.

**AY:** Haa.

**AO:** Waa meesha aan ka yaabayba nolosheeda. Dadkuna waxay qabaan dad reer badal ah iyo dad reer baadiye ah oo qalafsan sida Soomaalida.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Baadiyaheedii yaah. [qosol]

**AY:** Qalafsan, dabeecad ahaan.

**AO:** Dabeecad qalafsan. Waad iska taqaan reer baadiye dad qalafsan weeye, waxba iga jiraanoo dhulkaas bay fariisanayaan oo dhulkaasay seexanayaan oo.

**AY:** Yaah.

**AO:** Hal rooti oo kaliya iyo farmaajay isku cunahayaan oo isku goosanayaan mindi bay wada haystaan. Waa is dilaan.

**AY:** Way is dilaan.

**AO:** Bismilaahi Raxmaani.

**AY:** Sideedaba.

**AO:** Haa, say u xun tahay meeshaasi.

**AY:** Haye, haye, maxay isku laynayaan marka? Anagu qabiil qabiil baynu u kala soocanahaye iyagu maxay u kala sooc soocan yihiin?

**AO:** Adiga kooxo kooxo ayey kala leeyihiin oo adiga qabiil qabiil camal.

**AY:** Haa.

**AO:** Ma garatay? Dadku isku mid ma ahee. Ma garatay? Marka meeshaasaan ku noolaa. Baaruuraan ka qaadan jiray meel la yiraahdo Osiyeeri, oo 800 oo mitir.

**AY:** Maxaa la yiraahdaa?

**AO:** Osiyeeri.

**AY:** Osiyeeri.

**AO:** Haa, Osiyeeri waa qar yaah. Halkaas baan deganaa. Halkaas ka soo degtaa oo waxaan aadaa Badda.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Baddaan ka shaqeyn jiray, badda markaad socotid intaad gaarin. Baladyaal yar yar baa ku yaala. Meelihii yaah joogsi yaah.

**AY:** Hadba meel baad istaagaysaa.

**AO:** Waa makhaayado iyo biibitooyin. Hadaad is taagtid dadkaas Soomaaliduna saas ma aha, Soomaali oo ku soo dhaweynaysa oo idigoo aqoon wax ku siinaysaa ma jiraan uma malaynaayo adiga. Yaah, waa lagu so dhaweynaayaa waxaad rabtid cun, yaah [qosol] yaah.

**AY:** Soo tii la oran jiray nimanku midab kala soocaa ku dheeraa.

**AO:** Talyaani ma aha dadkaanayto, dadka layiraahdo Sardaayniyiintu dad Talyaani ah ma aha. Waxay dhahaan Talyaaniga wadankeena ka baxa.

**AY:** Gabigaba [u/i].

**AO:** Madax banaani baan rabnaa, waa dadkii loogu yimidoo asalkoodu uu ahaa Isbaanish iyo Giriig iyo balaayo isku jirta. Balaayo isku jira isku qasan. Marka maba aha Talyaani oo af u gooni ah bay leeyihiin Talyaaniga way bartaan iskuulkay tagaan way ka bartaan. [qosol]

**AY:** Waa sidaasay deeqda dad gooni ah ugu yihiin.

**AO:** Waa dad gooni ah.

**AY:** Marti qaadkana sidaasay ugu wanaagsan yihiin.

**AO:** Marti qaadka lama gaarayo aad iyo aad.

**AY:** Markaa waa qolyahaa qolyaha aad is barateen.

**AO:** Marka waxaan is baranay qolyo Fan shaxaniiin ah oo iyana Iskoobjarka ah iyo aduunyadaas.

**AY:** Oo iyaga ka mid ah.

**AO:** Waxaasaan dhex galay. Marka dadkaas weeye oo dadka ma taqaanaa aan la shaqeyn jiray oo aan wax isla samsameyn jirnay yaah.

**AY:** Ma iyagaa markaa ma kaa iibsan jireen waxa kanoo ma maal gelin jireen mise shaahaagay kuu ahayd?

**AO:** Maye shacabkaa iya iibsan jiray.

**AY:** Shacabkaa kaa iibsan jiray.

**AO:** Haa, ee iyagu farshaxan yahanay aheeyeen oo lafirkoodu waxoo day gadahayeen oo waa far shaxan yahano, laakiin wax waa ls isla cunahayaa, waa lays la joogaa, waa la sheekaysanayaa waa dad iska fiicanoo waxay laakiin waxa dhibta ah waxaa weeye waxaad galaysaa cidlo adiga Jasiirad baad degan tahay. Anigana hadee ma taqaanaa meeqa sanaan joogay Florence, marka hadii aad ka soo tagtid Jasiiradaas oo aad tagtid Talyaaniga. Talyaaniga kama tirsana, markay Talyaanniga iyo dhinacaas aadayaan waxay yiraahdaan Talyaanigaan aadaynaa.

**AY:** Talyaanigaynu aadaynaa.

**AO:** Haa.

**AY:** Talyaanigu wuxuu la yahay wadan kale. [qosol]

**AO:** [qosol] Waa wadan kale markaasaan, markaan aadaayo waxay qaadanaysaa 12 saacadood oo ah magaciisii Markab.

**AY:** Haa Oo waxaad raacaysaa.

**AO:** Aad bay u badan tahay.

**AY:** Een, imisaad joogtay?

**AO:** Waxaan joogay 7 sanno.

**AY:** Markaa mar Far shaxankaaga ku shaqeysanaysaa mise Aarkitikgarka.

**AO:** Labadaba.

**AY:** 7 sanno markaad joogtay xagaad qabatay?

**AO:** Waan ka soo tagay markii dambe Florence baan ku soo laabtay. Florence kaygaan iska joogay, hadee dagaalkii baa dhacay Soomaaliya.

**AY:** Oo sidee adigoo u maqan baa dagaalkii dhacay.

**AO:** Dagaalkii baa dhacay. [qosol]

**AY:** Ilaa iyo 1968 kii ilaa iyo ’90 kii.

**AO:** Anigu maya 1988 kii. Baan gabiga wadanka ku soo laabtay.

**AY:** Waxaad maqnayd 20 sanno bal hada u kaadi ilaa iyo 60 dan iyo.

**AO:** ’88 kii.

**AY:** 20 sanno ayaad maqnayd.

**AO:** ’88 kii baan wadanka ku so laabtay waxaa iri khalaas wadanka Talyaaniga. Talyaaniga waan ka soo tagay.

**AY:** Adigoo markaa isaga yimid Talyaaniga. Oo doonaya inaad wadanka ku noolaato.

**AO:** Waa isaga soo laabtay. Anigoo jooga Xamar ’89 kii. Soo dagaalkii iiguma dhicin.

**AY:** Markaa Xamar maxaad ka bilowday?

**AO:** Tabtii markaa waxaa weeye wadanka kuwii Qaramada Midoobay. Waagaas waxaa jiray dadka oo ma aragatay Jaamacadaha ka so baxay meel kasta ha ahaatee. Wadamaas kale. Qalabkii bay ku siinayaan aad ku shaqeyn lahayd wadankaagii.

**AY:** Haa, haa.

**AO:** Markaa diyaaradiina waa lagaa bixin, yaah. Markaa qalabkii bay I siiyeen diyaaradiina waa la iga bixiyey Istuudiya ayaan sameystay.

**AY:** Muqdisho ka sameysatay.

**AO:** Moqdisho. Sartaan meesha ay ku taalo Light House ka ma aragtay?

**AY:** Haa.

**AO:** Liido. Saraha saan u soo jeeda oo Badda ku jeeda. Dhinacaas halkaasaan ku jiray. Marka fiicanaa.

**AY:** Marka waad raaxaasanaysay.

**AO:** Saasaan u furi jiray daaqada.

**AY:** Ooh!

**AO:** Marka [u/i].

**AY:** Marka ay sidaa ku usoo gasho hawo layr macaan.

**AO:** Macaanaa yaah.

**AY:** Ooh!

**AO:** Meeshaasaan…

**AY:** Shanqadhiina waad maqlaysaa.

**AO:** Haa, Badiina hoostaydayba joogtaa waaba tanaa ma garatay. [qosol]

**AY:** Cajiib!

**AO:** Istareex bay ahayd, alla nolosho fiicnaydaa. Meeshaasaan qalabkii iyo magaciisiga muxuu ahaa meeshii lagu sameynayey.

**AY:** Haa Bad weyntii Hindiyana halkaasay kaa dhunkanaysaa laabtaadiina halkaasay ku taalaa.

**AO:** Waa saasaad ugu jeedaa adigoo fadhiya ar fiicanaa gaaladu waa ku dhintaan waa ku dhereraan. Markay arkaan waxaas. Aduunyadaasayto.

**AY:** Markay arkaan xeebta Liido.

**AO:** Xeebtaas.

**AY:** Xeebta Liido oo quruxda badan.

**AO:** Saa markaan u fiirino Light House kiina waad I jeedaa.

**AY:** Bad weynta Hindiyana.

**AO:** Ma garatay?

**AY:** Bahashiina ay qoslayso.

**AO:** Haa, alla fiicanaa.

**AY:** Quruxdeeda.

**AO:** Layrtaas kuu imaanaysa.

**AY:** Wax alaalle wax qashin ah laguma oga.

**AO:** Eber waxna ma jiraan, istareex adiga dhan aan gow gow, horta marka hore waa ka tagay gurigii, muxuu ahaa xafiiska—xafiiska walaalkay aan aaday oo ku yaala kuraaja-dal-suud. Meeshaasaan joognay markii xabadu dhacday.

**AY:** Xabadu sidee ay nabadi isaga jirtay bay xabidu bilaabmatay.

**AO:** Sidey nabad u ahayd bay gaw-gaw.

**AY:** Waa goorma markaasi aad gow-gowda maqlaysaan?

**AO:** Waa kowdii dii.

**AY:** 1990 kii bay ahayd.

**AO:** Haa 1990 kii.

**AY:** Sidii aydnu wax kale war ugu hayn baa maalin uu intaad halkaas marayseen.

**AO:** Maalinbaa saan u joogay gab. [qosol]

**AY:** Horta walaalkaa ma u tagtay.

**AO:** Walaalkay baan u tagay, meeshay iigu dhacday markaasaa war aan kala cararno, baabuur yar yar baan kala qaadanay oo waxaa la yiri meesha ha laga cararo, waxaan aadnay muxuu ahaa.

**AY:** Bishee weeye?

**AO:** Waxaa weeye 1990 bishii deseember. Markaasayba dhacday. Yaah, waxaan aadnay markaa Lambar afar kor. Guryuhu halkaas bay ahaayeen taleex xaafadaas yaah.

**AY:** Haa, waa gartay adiga iyo walaalkaa.

**AO:** Aniga iyo walaalkay kuligaya oo dhan baabuurkii baan qaadanay halkaasaan wada aadnay, guriga, hadee cidii oo dhan caruurtii… Meeshii baan tagnay war maxaan sameynaa war balaayo, waa iska joognay habeenkii waaba sii dhacday hadana mid ka xun yaah.

**AY:** Haye, rasaastii iyo dagaalkii.

**AO:** Siyaad Barre oo soo gamaaya geedii maxay ahayd magaceedii bumbadii iyo balaaladii kanoonigii iyo yaah. Markaasaa la yiri aan ka tagno.

**AY:** Waan gartay, xagaad qabateen markaa?

**AO:** Markaasaa waxaan aad aaday meel la yiraaho hade sheekadoo dhan ma aan kuu sameyn karee. Aad bay u weyn tahay. Waa kuu soo gaagaabinaayaa.

**AY:** Haa, haa.

**AO:** Barkee inta markaan baxnay. Oo guriga ka tagnay waqti bay qaadatay, arintaasaa iyana sheeko kale ah marka ma garatay?

**AY:** Markaa waxaa ka bayraysaan...

**AO:** Guriga anagoo ku jirna. Mayee tani waa muhiim. Anagoo guruga ku jirna cidiina aan gaynay Madina yaah. Yaa naloo soo galay.

**AY:** Askarti miyaa idiin galaya mise waxaa idiin soo galaya Jabhadii?

**AO:** Mayee waxaa noo soo galaya Jabhadii.

**AY:** Waa gartay Jabhadii markaa Caydiid.

**AO:** Haa 12 qof baan ahayn oo Abdiyo ku jiraan. Aniga iyo walaalahay sedex walaalahay ah iyo labo will oo kale oo no shaqeyn jiray iyo kuwo kale war meesha waa la buxsay. Adiga waxaan ahayn niman.

**AY:** Waa yahay.

**AO:** Yaah, wixii haween ah iyo caruur waxaan gaynay Medina. Guri halkaas ku yaalay. Baan si gaynay, markaa waa nala soo qabtay.

**AY:** Waa yahay.

**AO:** Waa yahay soo baxa. Banaatiiq bay saan u haystaan yaah. Ma garatay?

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Waa nala waday horey socda. Gadaal bay naga jiraan, jag jag yaah.

**AY:** Imisa qof baa idin wada?

**AO:** 7 ba ayaa na wata. Haye halkeen ku dilnaa.

**AY:** Halkaan ku dilnaa aah.

**AO:** Haa. [qosol]

**AY:** Halkaan ku dilnaa aah.

**AO:** Halkeen ku dilnaa, halkee baanu ku dilnaa, war waa inaan xerada gaynaa maxaanu u dilaynaa dadkaan.

**AY:** Midbaa leh.

**AO:** Maye kuwa kale waxay leeyihiin maya maya xerada ma geynayso dadkaanayto meelahaanaan ku dilaynaa.

**AY:** Waa maqlaysaan?

**AO:** Haa waa maqlaynaa haa waa maqlaynaa.

**AY:** Waxba la idin ka qarsan mayo.

**AO:** Maya la qarsanayo yaah. [qosol] Marka waxay leeyihiin haye suuqa siigaale aan ku dilno agaheeda yaah.

**AY:** Waa yahay, adigu markaa ileyn kuwii kale lama aad hadline.

**AO:** Hee.

**AY:** Markaad intaa maqashay waliba dee qof Soomaali ahoo macnaha- macnaha Soomaali ah baan uga jeedaa oo muddo wadanka ka maqnaana waa tahay.

**AO:** Haa, haa.

**AY:** Markay caynkaa ku leeyihiin maxaa madaxaaga ku jira?

**AO:** Yaah.

**AY:** Maxaa madaxaaga ku jira?

**AO:** Markaa waxaa is leeyahay bas weeye waa dhimatay.

**AY:** Khalaas.

**AO:** Khalaas weeye haday na qanteen barkee waxaan maqlay ka hor… In dad saas loo dilay yaah.

**AY:** Markaa adiga argagaxiska kuugu weyni waxaa weeye dhib ma aad soo arkinin, dagaalka waa maqlaysay ee wali xabadi kuma soo gaarin.

**AO:** May.

**AY:** Ma cararin cid is maydnaan qabanin guri baan joogtaa ma qura laguu soo galay oo lagu yiri ina keen dabadeetana waxaa la leeyahay xagaanu ku dilnaa.

**AO:** Xagaan ku dilnaa horta hore xabado iyo waan soo arkay laakiin wax iguma dhicin aniga, waan arkay.

**AY:** Laakiin adiga mid lagugu soo…

**AO:** May.

**AY:** Gamay ma jirto.

**AO:** Haa, xabad ordaysaa agtayda soo martay.

**AY:** Way sioo martay.

**AO:** Way soo martay halkaas, xabadna intay iga soo baxday oo darbi ku dhacday, waxaas waa soo arkay.

**AY:** Adigoo soconaya?

**AO:** Haa, nasiib baan qabay laakiin waa lagu dilahayaa waligay ma maqlin, maan arkin.

**AY:** Waan gartay.

**AO:** Markaasaa nala soo wadayoo gab-gab, gab-gab darbiga yaah kuligiin yaah. Darbiga saas.

**AY:** Darbiga ku tiirsada.

**AO:** Darbiga ku tiirsada adinka dhanba iyagana intay joogaan haye.

**AY:** Waa la qabaystay qoryihii.

**AO:** Waa la cabaystay, saanay nagu yihiin anagana saanaan nahay.

**AY:** Waa ku tiirsateen.

**AO:** Iyagu waxay dhaheen wajiga indhaha ma idiin xirnaa may may waxaad xiraysiin ma jiro, yaah nooma xiraysaan maxaad noogu xiraysaan hadaan dhimano waan dhimanay.

**AY:** Idinkaa la idin waydiinayaa?

**AO:** Haa, yaah indhaha [qosol] yaah.

**AY:** Imisaa tihiin intiina markaa gidaarka lagu tiirinayaa?

**AO:** 12 qof.

**AY:** 12.

**AO:** Haa.

**AY:** Haa, 12 baa tihiin haye.

**AO:** Markii dambe baa iyago markaas cabaysanaya.

**AY:** Haa.

**AO:** Qorigii.

**AY:** Haa.

**AO:** Baa nin halkaas ka soo baxay, meesha qof ma socdo bini'aadam ah yaah.

**AY:** Xaafadeed baa markaa joogtaan?

**AO:** Ma jirto kor guriga.

**AY:** Lambar 4.

**AO:** Oo Taleex. Baan baan soo uga soo baxnay hoos baan soo aadnay yaah, dhinaca Koonfurta. Koonfurtaan soo aadnay yaah oo guryahaanayto dhex dhexdooda oo jidadkii lama maraayo jidad waaweynaaday yaah, Makka-Al-Mukkarama…

**AY:** Waa saacadee?

**AO:** Yaah.

**AY:** Waa xilima ma habeen baa?

**AO:** Bimilaah waa 2 subaxii oo kulaylka jira yaah.

**AY:** Haa.

**AO:** [qosol] Aad ka naxaysid.

**AY:** 2 dii subaxnimo?

**AO:** Subaxii 2 dii duhurnimo.

**AY:** 2 dii duhurnimo.

**AO:** Oo xun duhurnimada meesha ugu kuleylka badan.

**AY:** Haa.

**AO:** Dab wuxuu naga leeyahay dhididku waa naga da'aayaa. Dhash-dhash baad maqlaysaa dhididka yaah.

**AY:** Ma dhididka mid qoroxu keentaybaa mise waa mid baqdani keentay baa mise labadaba?

**AO:** [qosol] Mayee waa qorax iyo labadaba.

**AY:** Kolkaa gidaarkii baan ku tiban tihiin ku tiirsn nahay nin baa soo baxay.

**AO:** May.

**AY:** Wuu cabaystay.

**AO:** Walaalkay oo hada London jooga.

**AY:** Haa.

**AO:** Halkaasuu degan yahay ninkaasi baa wiil yar oo ordaaya arkay isaga dadka xaafada dhan

bu yaqaanay waa wiilka noogu yar weeye qoyskeena laakiin nin weyn weeye hada 40 jir waa yahay yaah.

**AY:** Waa gartay, walaalkaa baa ilmo yar oo ordaya arkay?

**AO:** Isagana waa ku jiraa dadkii.

**AY:** Dadka gidaarka.

**AO:** Waxna kuma jira asagu waa nin balaayo ah waa qayliyey magacii buu ugu wacay ma aqaan Yusuf yaah, wiil yar weeye adiga saas uma weyna.

**AY:** Macnaha markaa ka kuwa doonaya in ay idin laayaan…

**AO:** Haa.

**AY:** Buu ku jiraa.

**AO:** Yaah, wuu ku jiraa.

**AY:** Macnaha wiilkuu uga yeeray.

**AO:** May.

**AY:** Magaciisuu ugu yeerayaa.

**AO:** May mid jidkaas marahaya.

**AY:** Oo iska cararaya oo nin yar ah.

**AO:** Oo iska cararayoo wiil yar ah. Laakiin dad ma socdo, wiilkaas kaliyaan aragnay oo ordaaya oo guriga xagiisu galay, guriga aabihiis iyo gurigeena ma kala foga saan baan isku nahay markaas waa na yaqaan wiilku yaah.

**AY:** Wiilkaa aabaha u sheegay aabihii baa soo baxay yaah.

**AO:** Waa gartay duqii baa soo orday haye maxaad meeshaan ku haysaan?

**AY:** Haa.

**AO:** Dadkaaneetaan helnayoo oo ma taqaanaa – ma taqaanaa foon ku hadlayoo ma taqaanaa oo Siyaad Barre. War waxaasayto iska daaya dadkaanayto aabahood aan aqaanaa cidaan daris aan nahay yaah. Say usala hadlaayeen, say usala hadlaayeen labo saacadood iyo bar yaah.

**AY:** Bay ku qaadatay. Labo saacadood iyo bar baa la wada hadlayey.

**AO:** Haa, ay jug jug siinaayaan buntukha, walaahi dila yaah dadkaani waa dadkii anaga na soo isticmaarsaday, ma garatay? [qosol] Yaam saasay leeyihiin.

**AY:** Ma garanaysaa markaa cida idin haysta markaa.

**AO:** Haa, haa haa. Waa reer Mudug.

**AY:** Haaye markaa qabiil ahaan baad…

**AO:** Waa reer Mudug, qabiil ahaan weeye sheekadu.

**AY:** Qabiil ahaan gartay, waa u garateen, laakiin hebel iyo hebel miyaad u garanaysaan.

**AO:** Kuwee dadkaa?

**AY:** Ha kuwa meesha idin ku haya.

**AO:** May maya ma naqaan meel ay ka yimaadeen.

**AY:** Laakiin in qabiil la idin ku haysto.

**AO:** Garanay, waa garanay.

**AY:** Kolkaa marka qabiilka waxa la idin ku haystaa ma Majeerteen baad tihiin mise waxaa la idin ku haystaa Daarood baad tihiin mise waxaa la idin ku haystaa?

**AO:** Hoose sii aad.

**AY:** Hoos sii aad baa.

**AO:** [qosol] Haa.

**AY:** Majeerteenkii baa is haysta.

**AO:** Majeerteenkii waxba ugama jiraan, hoos sii aad Majeerteenka, sii kala bixbixi Cismaan Maxamuud anaga ma nihinoo.

**AY:** Cismaan Maxamuud, haa.

**AO:** Haa. [qosol]

**AY:** Hagaag, markaa Cismaan Maxamuud yaa idin haysta intiinan dhan oo gidaarka tubani ma

wada Cismaan Maxamuud baa tihiin?

**AO:** May, kuwa aan hadlin baa jira oo Ogaadeen mid ah, mid Shiikhaal ah.

**AY:** Laakiin Cismaan Maxamuud ahaanbaa la idiin haystaa.

**AO:** Iyagaa u badan kaligeena inaga weeye dadkii meesha joogay yaah.

**AY:** Cismaan Maxamuud ahaan baa la idiin haystaa.

**AO:** Waa kaasaa waad garatay.

**AY:** Hagaag, waa ayo nimanka idin haystaa?

**AO:** Waa Cayr yaah.

**AY:** Oo odayga loo yeeray ee inanku u yeeray ma Cayr baa isna?

**AO:** May, waa Sacad.

**AY:** Waa Sacad.

**AO:** War wixii qabiil bay isu rogeen oo noqotay sheekadii. Marka ninku waa Sacad, ee duqay aad isu yaqaaneen yaah.

**AY:** Aabahaa.

**AO:** Haa.

**AY:** Marka asagiiba nimanka hor taagan?

**AO:** May.

**AY:** Maxaa jira.

**AO:** Nimankaan anaa wadaaya anigaa mas'uul ka ah. Yaah, foon iyo waxaa I tusa wax ma haystaan waa been, wuu gartay war wax foon ahi ma jiro yaah, cid bay la hadlaayeen oo waxay lahaayeen halow – halow yaah, Siyaad Barre.

**AY:** Waad maqlaysaan markay saa leeyihiin?

**AO:** Waa maqlaynaa agtoodaan joognaa. [qosol]

**AY:** Cidina idinka waxba idin waydiin mayso.

**AO:** Yaa wax ku waydiinaaya adiga yaah. Iyagii baa isla hadlaaya markaasu yiri soo baxa waa na so waday.

**AY:** Asagii baa idin soo waday.

**AO:** Haa, intaan sii soconay buu wuxuu yiri hadeertaan ka carara gurigii ha ku laabanina yaah, yaah.

**AY:** Waa gartay, idinkuna inaad gurigiinii ku laabataan ma aha fagax baad tiraahdeen.

**AO:** Dhag waxaan aaday Madiina. [qosol]

**AY:** [qosol] Balaa joogta haye, ka yaacde.

**AO:** Ka yaacnay.

**AY:** Markaa gurigii ma ku noqoteen oo cidina wax ma kala soo baxday? Mise qof waliba intuu sitay buu la yaacay?

**AO:** Gurigii baan tagnay cidii iyo caruurtii iyo wixii hadee guriga baabuur baabuuradii baan soo qaadanay inaan ku laabano weeye alaabaa nooga jirta meesha.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Baabuurtii baan soo qaadanay gurigii kalaan aadnay labo gaari baa noogu jirtay, wixii baan ku gurnay. Banaankaan u soo baxnay yaah, mise Abgaalaa meesha joogaba, waa nala qabtay. [qosol]

**AY:** Hadana waa la idin qabtay.

**AO:** Abgaalkii yaah. Markaasay yiraahdeen yaah saan saan, qolmaa tihiin? Waxay yiraahdeen ninkan iyo xaaskiisa oo anaga nala socda ha idin raaco yaah.

**AY:** Ninkee?

**AO:** Wada.

**AY:** Waa ninkee?

**AO:** Nin iyaga ka socda Abgaalka.

**AY:** Maxaa markaa ma waxay idin leeyihiin ha idin badbaadiyo mise…

**AO:** Badbaadiya ninkan oo Majeerteen ha sheego. Majeerteen buu sheeganaayaa.

**AY:** Waayo muxuu isaga yaa doonaya oo raadinaya.

**AO:** Koontaroolka Xamar markii laga baxo.

**AY:** Haa.

**AO:** Yaah Majeeraankii baa jooga, yaah.

**AY:** Haa oo macnaha. [qosol]

**AO:** [qosol] War maseeboow fara badanaa.

**AY:** Balaayaa soo korodhay Sow waxaa weeye hadii aad Xamar ku badbaadaan oo aad u badaan oo aad gaartaan melihi kale ee Majeerteenkii joogay waxaa iyana la u gaarsanayaa Hawihii.

**AO:** Meeshaaba lagu dilay.

**AY:** Habaar baa soo korhay.

**AO:** Meeshaaba lagu dilay.

**AY:** Oo lagu dilaa.

**AO:** Haa. Waa la kala bixinayaa dadkii. Adigyu yaa la tahay, yaa ka tahay. Xaga aad, xaga aad dhaararag yaah.

**AY:** Hagaag marka meeshii baad ka baxdeen.

**AO:** Meeshii baaan marnay.

**AY:** Asagiina waa idin la socdaa.

**AO:** Waa nala socdaa. Markaa kuliyago waxaan sheeganay bay fiirfiiriyeen. Labadii aan wadanay [qosol] iyo cidii aan wadanay fiirfiiriyeen. Dadku isuma eka ma ogidoo. Wax bay garanaayaan.

**AY:** Haye.

**AO:** War iska tagay dheheen baxa, yaah ma garatay. Waa iska soo tagnay adigu Afgooye iyo Xamar Dhexdooda aan ku dejinay meel. Isaga iyo xaaskiisii iyo caruurtiisiiba, yaah, halkaas bay kak baxeen fag.

**AY:** Adinku halkaa tagteen markaa?

**AO:** Waxaan tagnay Afgooye hadee Sheekada Afgooyana waa badan tahaye, Afgooyaan tagnay Shalanbood, waan ka tagnay Kismaanyo.

**AY:** Waa gartay Kismaanyo markii aad gaadheen, bal ka hor intii aysnaan Kismaayo gaarin, halis kale oo caynkaas ah mala kulanteen, ama ma isdin ku soo baxday?

**AO:** Khataryaal badan baa jiray.

**AY:** Tee baa ugu adkayd?

**AO:** Horta hore, khataryaashu…

**AY:** Mirarnka ugu adkaa?

**AO:** Ugu waynaa? Haa ee aan ka soo tagay.

**AY:** Haa.

**AO:** Waa badan yihiin sheekooyinku kahataryaashaan ka soo tagnay waxay ahaayeen markaan joognay yaah waxay ahayd markaan joognay gurigeenii Xamar. Ineysan soo gelin Xamar.

**AY:** Yaah.

**AO:** Oo aan nala qabqaban hadee meeshii cunto la'aan baa dhacday. Baahi Bariid cad iyo biyo dad aan u baran baa ahan anigu oo nolol macaan ku jiray.

**AY:** Noloshii la daawanayey Bad weynta Hindiya. [qosol]

**AO:** Bada Hindiyaan la daawanayey. [qosol] Iyo nolosha macaan ee aan ku jirnay.

**AY:** Xeebta, xeebta.

**AO:** Xeebta.

**AY:** Yaah, yaah, waa gartay.

**AO:** Aduunyo ku jirnay.

**AY:** Haa, haa.

**AO:** Yurubna aduunyo macaan ku jiray. Markaa sidii dee meeshoo loo joogay ayaa aniga iyo afar walaalahay ahi qoryaan wadanaa Xamar galnay. Xamar oo xaaldu xun tahay dadkii ku

laabtaan nahay.

**AY:** Qoryaad wadataan.

**AO:** Qoryaan wadanaa.

**AY:** Waad gaajoonaysaan oo.

**AO:** Xaalku waa xun yahay. Waa nolol mise waa geeri.

**AY:** Waa la iloobay yshaarkii cadaa.

**AO:** Waa la hilmaamay. Haa, markay xaaladu xun tahay axaad ka cabsanayso ma jiro.

**AY:** Haa, mar hadaad waliba gaajootid.

**AO:** Markaad gaajootid oo rabsho jirto dhib weeye gaajadu. Biyo cad weeye waxaa la cabayaa oo lulumo ku jirto.

**AY:** Haye.

**AO:** Lulumada waa taqaanaa.

**AY:** Haa, haa anigu reer miyi baan ahaye.

**AO:** Adigi reer miyi baad tahay. [qosol]

**AY:** Haaye, lulumada iyo nooceeda oo dhan baa garanayaaye, haye.

**AO:** Markaan soo marnay Fii-eejito, saa naag baa nala socota. Oo tiri bakhaarkayga furihii baan haystaa gurta wixii aad rabtiin barkee waa la imaan waa la guran, yaah. Hawiyihii yaah.

**AY:** Haa, haa.

**AO:** Markaasaa markaan u soo dhawaanay xabado nalagu furay, markaasay tiri suga waxna ha ku furinina waan aqaanaa, waa askartii Siyaad.

**AY:** Oo suga.

**AO:** Sugay tiri.

**AY:** Sugay tiri waa askartii Siyaade.

**AO:** Sugay tiri.

**AY:** Waan garanayaaye.

**AO:** Waa na fiiriyeen waa na garteen, waa soo degnay waxaa niri raashin baan rabnaa.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Iyagana raashinkay daldalanaayaan.

**AY:** Iyana waa raashin doon.

**AO:** Haa [qosol] wixii bakhaaro ahaa raashinkii baa la daldalanaayaa, keedii waa xiran tahay, keedii bay furtay, dagaalkana wuxuu ka socdaa na naga foga anaga.

**AY:** Waa maqlaysaan.

**AO:** Waa bangiyaashii.

**AY:** Halkaan raashinka ka guranaysaan waa Bangiyadii yacni.

**AO:** Maya waa Fii-eejito.

**AY:** Ee meeshuu ka socdaa ah ee aad raashinka ka guranaysaan.

**AO:** Waa dhinaca Fii-eejito oo Fiiya-rooma iyo markii laga baxo oo dhinacaas la saan suubar shineema gadaasheeda. Halkaas weeyaan meeshu yaah. Meeshiibaan baasto bariid balaayo, oolyo war wax kasta.

**AY:** Waan gurayay.

**AO:** Waxaanaa soo qaadan ma jirin. Taasi mid bay ahayd.

**AY:** Waan gartay taasi mid bay ahayd.

**AO:** Tan kale waxaa weeye markaan nimid meesha maxaa weeye magaceeda Shalanbood. Anagoo markaas meel makhaayad ah soo galnay. Oo rabna in aan wax cuno.

**AY:** Haa.

**AO:** Ninka makhaayada lehi waa saaxiibkeen waa nin aan naqaanay, yaah yaah, markaasuu na oo dhaweeyey oo cunto na siiyey lacag la'aan ah oo la joognay saan u joognay ayaa waxaa soo galay USC kooxdii jabhada ahayd, yaah, yaah.

**AY:** Idinkoo meeshii jooga.

**AO:** Anagoo joogna [qosol] nasiib ninka kornaylka ah oo wata waa nin aanu isku kuleejo ahayn oo aanu is naqaanay.

**AY:** Waa Soomaali iyo dabeecadeeda, meela kala tagi maayaan, haye.

**AO:** Meelna kala tagi ay maayaan ma aragtay adigu.

**AY:** Haye.

**AO:** Markaasuu igu soo booday oo wada sheekaysanayoo oo isla hadlnayoo.

**AY:** Waa ninkii ciidamada watay baad is qabsanaysaan.

**AO:** Waa ninkuu ciidamada watay meesha [qosol] yaah dadkii horaan isla ahayn ee kulaajyada, yaah, waa dadkii is yaqaanay oo fiicnaa. Mar marse waxyaalahaas baa dhaca ma garatay. Dadka oo Xamar oo aan reer baadiyaha ahayn. Oo dadka liita aan ahayn ee dadkii war bartay ama banaanka aaday dabci gooni ah ayey leeyhiin waa dad fiican. In kastay Siyaad Bare la dagaalamaayaan.

**AY:** Uh-uuh.

**AO:** Yaah, mar kalena waxay ahayd makhaayad Maka-Almukarama gadaasheeda. Anagoo marayna ayaan waxaan aragnaa 30 hubaysan oo ulo wata oo ordaaya.

**AY:** Hubna way sitaan.

**AO:** Waa jabhadii.

**AY:** Hubna way sitaan.

**AO:** Haa, ulay sitaan.

**AY:** Ulaha maxaa lagu sameynayaa.

**AO:** Ulo iyo mindiyo ayey sitaan, mindiyo.

**AY:** Haye.

**AO:** Dagaal.

**AY:** Yey la dagaalamayaan.

**AO:** Waxay la dagaalamayaan Siyaad Barre iyo muxuu ahaa askartiisii. Xaafad yimaadeen.

Xaafadayba joogeen markaasi, mid aan Florence Talyaaniga isla joogi jirnay baa meeshaba wata yaah.

**AY:** Kuwaasna kii watay baa garanaysaa.

**AO:** Markaasuu igu soo booday oo aan sheekaysanay markaasu yiri maanta waa iga taagan tahay iga raali ahow, xaaladu maanta waa xun tahaye yaah.

**AY:** Ciidamadiisii buu watay.

**AO:** [qosol] Ciidamadiisii buu watay.

**AY:** Ciidamadiisii buu watay wuu ku dhaafay. Waaw.

**AO:** Sheekadu qabiil bay sheekadu waa Siyaad Barre iyo Mareexeen anaga nooma jeedaan markaas.

**AY:** Qoladatani markaa.

**AO:** Haa [qosol] yaah. Waana Abgaal iyo Murursade isku jira waa dadkale.

**AY:** Markaa waa Siyaad iyo jabhadii.

**AO:** Markaa waxaa tagnay Shalanbood, waxaana halkaa nooga go'day shidaalkii. Shidaal la'aan. Markii dambe maamadaa nala joogay oo naag kale ay heshay oo ay is yaqaaneen oo lacag siisay bas waa gadanay gaaskii waan ku shubanay Kismaanyo aan ku dhufanay.

**AY:** Waa gartay, Kismaanyaas tagteen.

**AO:** Kismaanyaan cabaar joogay wax yare oo aan saa u badnayn, saa uma badnayn.

**AY:** Markaa maxaa kugu jira, ma xasuusan tahay waxa kugu jira, ma waxaad leedahay adigu gaar ahaan.

**AO:** Yaah.

**AY:** Ma waxaad leedahay lafahaaga la cararay ma dagaal baa xataa kugu jira?

**AO:** May, may.

**AY:** Lafahaaga la cararay.

**AO:** Lafahaaga la cararay oo ka tag oo Kiinya gal.

**AY:** Yaa ku haya.

**AO:** Weeye sheekadeenu, hal mar.

**AY:** Hub ma sidataa.

**AO:** Horta mar waa nala qabtay, yaah, anigaa la I qabtay.

**AY:** Uh-uuh, yaa ku qabtay?

**AO:** Xabis baa la I galiyey.

**AY:** Yaa ku qabtay?

**AO:** Jabhada. Hadee ma garatay.

**AY:** Xabsi baa lagu geliyey?

**AO:** Jabhadu waxay ku way diinaaayaan ma dowladaad la socotaa? Maxaad tahay? Maxaa magaciisi ah iyo.

**AY:** Maxaa lagaaga bilaabayaa, marka ugu horeeysa ma waxaa lagu leeyahay yaa tahay?

**AO:** Yaa tahay baa ugu weyn.

**AY:** Hagaag, maxaa marka markaad og tahay in xiligaa Daarood la doon doonayey.

**AO:** Yaah.

**AY:** Maxaad samaynin? Maxaad samaynin? Maxaad oran lahayd?

**AO:** Waxaad sameyn kartaa ma jirto.

**AY:** Waa in aad iska sheegtaa cidii aad tahay.

**AO:** Waa in aad iska sheegtaa, yaah hadii lagu yiraaho meesha sheekadu anigu qabiil maba aqooninba oo dad Xamar ku koray oo qof kastaba saaxiib la ahaa.

**AY:** La ahaa.

**AO:** Oo Talyaaniga markaan joognay gurigeena waa gal ka soo bax waxa dad imaanaaya oo cunto cunaaya oo seexanaaya oo Soomaali ah waad yaabaysaa wax ay yihiin ma aanan aqoonin.

**AY:** Laakiin, hada dee waad garanaysaa hadaadan abtirsiiyahaaga garanayn.

**AO:** Anigu ma garanayo runtaan sheegayaa.

**AY:** Laakiin, waa garanaysaa cidii qabilkaagu yahay iyo laftaad sii tahay iyo.

**AO:** Haa, laftayda.

**AY:** Haa, intaa waa garaaysaa.

**AO:** Sedex ma dhaafin karo, ma garatay intaa ka badan ma socon karo ma aqaani. La iguma korin qabiil barkee duqa waa diidi jiray qabiilka, yaah aabahay, markaa ayeyday baan ka bartay iyo dadka imaanaaya.

**AY:** In yar oo dusha ah, haa.

**AO:** Haa, in yar oo dusha ah, haa.

**AY:** Wa saas ah.

**AO:** Wa saas ah oo muhiim ah ma nala ahayd.

**AY:** Marka markii lagu qabto qabiilkaagaa lagu waydiini.

**AO:** Maxaa la I waydiin aniga war markii lagu qabto waa ku yaqaaniin.

**AY:** Markaa war ku garanayaan inta badan.

**AO:** Xamar ma joognaa way ku yaqaanaan dadka meesha joogaa.

**AY:** Haa waa is yaqaanaa, marka markay ku qabteen, maxay ku yiraahdeen?

**AO:** Siyaad Barre miyaa la shaqeysaa lama shaqeyn waligay, yaah waligayna lama shaqeyn waqti yar baaban joogay oo sanad ma dhama.

**AY:** Maa tiraahdid anigu xeebtaan deganaa. [qosol]

**AO:** Markaaana xeebtaasaan deganaa istireex marna Talyaanigaan joogay, saan hal sanno aan joogaaye.

**AY:** [qosol] Yaah. Maba aan aqaanba waan gartay.

**AO:** ’88 ki ayaan tagay. ’90 tigiina waxaa dhacay dagaalkii markaasaa waxaas lagu waydiinin. Markaa jir dil aan waxba lahayn oo ay geedka kugu gubaayaan, maxay ahayd sigaarka yaah.

**AY:** Haa, oo sigaarka ma kugu gubayaan.

**AO:** Haa, haa.

**AY:** Oo markii nabaradii ma kugu yaaliin.

**AO:** Waa ku waasoo soo uma jeedid.

**AY:** Sawiradaa gacanta kaaga yaala.

**AO:** Haa, iyaga weeye markii dambaa nin ii yimid I yaqaanaa oo wuxuu yiri, war maxaad ka rabtiin ninkan waa naqaanaa, ninkaan Talyaanigaan isla joogi jirnay yiri ma taqaanaane, sheekadaba kuma jiro.

**AY:** Kuwa ku gubayaa, ma reer miyibaa ma caruurbaa.

**AO:** Waa reer miyi, waa reer miyi.

**AY:** Oo waliba caruur uu badan waa iska dhalin yaro.

**AO:** Marka waagii dambe waa ka soo tagnay Kismaanyo ayaan nimid, Kismaanyo ilaan meeshii dagaal waa la is diyaarinahayaa dadkii waxaa soo socda Caydiid waa og yihiin.

**AY:** Halkaana waa qabyaalad kale.

**AO:** Shalaanbood buu joogaa maba fogaba.

**AY:** Halkaana waa qabyaalad kale.

**AO:** Waa qabyaalad kale.

**AY:** Oo Daaroodkii baa ku sii jeeda.

**AO:** Waxaa la yiri Kismaanyo ayaa la idinkugu imaanayaa marka waa in si diyaariyaan, mise waa iney cararaan oo ku shubaan Badda in ay aadaan. Mise waa in aadaaan Kiinya. Walaahaan tagayn bay dadkii meeshaan waa dagaalamaynaa.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Anigii yaab. Meel xun baa ka soo tagay oo dagaal ah. Hadana meeshatan baan ku xirmay. Maba ku fakarayn. [qosol]

**AY:** [qosol] Yaah, yaah.

**AO:** Waxaan sameeyo hadana waa in aad qiri qaadataa.

**AY:** Markaa maxaa kuugu daran ma naftaadaad u baqaysaa ma in aad cid dishaad ka cabsanaysaa?

**AO:** Maya ma jirin.

**AY:** Iyamaa kuugu weynayd.

**AO:** Qof dil.

**AY:** Ma ka fakaraysaa marka hore.

**AO:** Waa ka fakaraayey, walaahi bilaahi waa ka fakaraayey labadaba nololshayda iyo qof aad dilaysidba, yaah laakiin, hadii lagu soo weeraro. Xamar hada gurigii nala ka qabtay. Qorigaygaan haysanay.

**AY:** Oo waad og tahay maalintii markii la idin lahaa gidaarka ku tiirsada, hadii aad qori haystid oo aad awood u haysatid.

**AO:** Waa dili lahyn kuligood.

**AY:** Dee haa.

**AO:** Mana na arkahayaan maxaa dhacay dheh, waa guryaha fiilada ma garatay? Gurigeena Xamar ee Taleex ku yaalay waa guri yar oo isaga dhan gidaar iyo geedkii.

**AY:** Laakiin maalintaa hadii aad qori haysato wax waa dili lahayd.

**AO:** Waa dili lahaa. Waa dili lahaa haa , kuli waa dili lahaa, qoryahu gudahay ku jireen mana ay fiirin yaah [qosol] markaasaa dagaal iyo waxaas anigu kuma jirin hoteelkaan iska joogay cidaan la joogay saa caruurtii iyo wixii oo dhan baa la wadaa. Markaa duqday waxay tiri xaaladu waa xun tahay, dagaal baa soo socda anagana waxaan rabnaa in aan cararno ooo Kiinya galno, yaah meeshaas baahi in ay nagu disho ma rabno adiga carar.

**AY:** Hooyaa kugu tiri.

**AO:** Haa, oo lacag iyo wax noo soo dir.

**AY:** Oo ka sii bax meesha.

**AO:** Ka sii bax meesha. Oo waxaa yeeli lacag iyo wax soo dir. Laakiin aniga kaliya weeye qofka baasaboor talyaani ah haysta. Mana haysane waa iga dhacaye waa aniga qofka kaliya ee bixi kara.

**AY:** Adaa ugu fududaa. Laakiin baasaboor Talyaani ah waad lahayd soo ma aha.

**AO:** Mayee ma haysan.

**AY:** Haaye dee yaadan haysanine laakiin mawaadin baa tahay.

**AO:** Haa.

**AY:** Muwaadin ma ahayn.

**AO:** Ma ahayn.

**AY:** Hagaag, waa gartay.

**AO:** Markaa waan baxay bahashan halkan I-94 miyaa la yiraahdaa. Waxaas oo kale ayaan haystay.

**AY:** I-94 ka Minnesota. Waan gartay waad soo gashay markaa.

**AO:** Markaa Safaarada Talyaaniga ayaan tagay.

**AY:** Markaa Kiinya aad soo gashay.

**AO:** Maya wali ma tagin.

**AY:** Oow, oow.

**AO:** Waan baxay.

**AY:** Kismaanyo aad joogtaa.

**AO:** Kismaanyo waa ka soo duulay diyaarad baan ka soo qaatay.

**AY:** Kismaanyo ayaad diyaarad ka soo raacday.

**AO:** Kismaanyo ayaan diyaarad ka soo raacay.

**AY:** Markaasaad Moudisho ku soo noqotay.

**AO:** Diyaaradii Jaamac Buluug. Diyaaradaha Jaadka iyo waxaas qaada.

**AY:** Baad soo raacday.

**AO:** Kuwaasaan soo raacday anagoo dad badan ah dhulkaa la far fadhiyaa. Diyaarad ma aha waa mid yar ah dhulkaa la far fardhiyaa taasaan soo qaadanay. Adigu Kiinyaan imid Kiinayaan cabaar jog joogay.

**AY:** Muqdisho kumaad noqone Kiinyaan timid.

**AO:** May, may Nairobi.

**AY:** Hagaag baad timid oo ku timi diyaarada qaadka.

**AO:** Nairobi baan ma taqaanaa Soomaali al joogay cabaar adigi warqado ayey ii sameeyeen.

**AY:** Warqado foorgari ah.

**AO:** Warqado foor gari ah.

**AY:** Oo noocma ah, haye, haye, Soomaali.

**AO:** Nin fiican baa jiray oo sax ah.

**AY:** Haye, haye,markaa adigu waraaquhu maxau sheegayaan in aad tahay?

**AO:** Inaan Soomaali ahay, in aan saan saan ahay. Adigu Faar gerigii ayaan ku soo baxay oo ku imi Mareykanka.

**AY:** Kaasaad ku timi Maerykanka.

**AO:** Kaa saan ku imid Mareykanka. [qosol]

**AY:** Oo maxaad ka soo raacday Kiinya?

**AO:** Diyaarad baan ka soo raacay Kiinya.

**AY:** Haa macnaha dee Fiisana waa kuugu dareen.

**AO:** Haa, haa, nin haysta wax kastaba yaan ka soo qaatay wixiisii.

**AY:** Wixii sii alaabtiisii oo dhan.

**AO:** Ee lacag baan siiyey.

**AY:** Nin alaabtii Mareykan sharcigii wixiiba haysta ayaad ka soo qaadatay.

**AO:** Haa.

**AY:** Oo diyaarad ku soo raacday oo magaciisii ku timid. Halkaan timi magaaladee timid?

**AO:** Xagee horta magaaladee ku soo degay. Maya horta xaaskaygaa waxay joogtay Boston. Boston baan ku soo degay.

**AY:** Faadumo ayaa joogtay Boston.

**AO:** Faadumo ayaa joogtay oo iyana kuleej ku jirta. Hadee saan u joognay dhibaato waxaa noqotay sidii loo helo 1-94 kii.

**AY:** Haa ardyanimoo ayaad ku soo gasheen.

**AO:** Iyo tii shaqada, ma garatay. Tii baa ma aragtay dhib bay noqotay.

**AY:** Sidii aad sharci ku heli lahaydeen, markaa goormaad soo gashay? Sanadkee ayaas soo gashay.

**AO:** $7,000, 1991 kii. $5,000 ama $6,000 oo doolaar ayaa qareenku qaadanaayaa.

**AY:** Magan gelyada iyo waa gartay. Markaa magan gelyada ma waxaa ka xaraysay Boston mise…

**AO:** May.

**AY:** Boston baad markii hore timid.

**AO:** Boston qaali bay noqotay waa ka soo tagnay, waxaan soo aadnay gabar ay taqaanay Faadumo oo ay saaxiibo yihiin oo waa hore timi Rochester, Minnesota. Ba tiri war meeshaan imaada waa la idiin sameynayaaye.

**AY:** Idinkoo jooga Boston.

**AO:** Anagoo Boston Joogna. Meeshaa nimi haday wax bay noo fiir fiirsay hadee waxay tiri, waa in aad tagtaan Minneapolis.

**AY:** Minneapolis.

**AO:** Haa, Minneapolis bay joogaan qareenadu.

**AY:** Waan gartay, waan gartay.

**AO:** Qareenkii waa naloo sheegay meeshaan ugu tagnay, wixii oo dhan waa noo dhameeyey nasiibkeen Alxamdu Lilaah.

**AY:** Lcag xagaad ka keenteen, lacag cidi idin kama qaadan.

**AO:** Cidina lacag nagama qaadan.

**AY:** Caanad la idin kama qaadan.

**AO:** Walaahi cidi nagama qaadan waxba nasiib [qosol] yaah Alxamdu Lilaah.

**AY:** Saasaad ku degtoon oo sharci ku qaadateen.

**AO:** Saasaan ku degnay oo sharci ku qaadanay.

**AY:** Meeshii 10,000 ka kun la idin waydiinayey am aha.

**AO:** Haa, lacag badan oo dhibtaas iyo qaxarkaas ma jiro.

**AY:** [qosol] Haye. Maxay markaa shaqadii kuugu horeysay ay ahayd?

**AO:** Yaah.

**AY:** Adigu ma hawshaadii baad iska gashay? Faadumo way shaqo tagtay. Adiguna waxaa wadatay far shaxankii.

**AO:** Aniga far shaxankii iyo urur beeleed iyo adeegyo kale iyo waxyaalahaasayto, haa, dadkaan caawinaayey iyo.

**AY:** Wixii kuugu horeeyey ee aad soo bandhigto ee markaa ka yimid Mareykanka maxau ahaayeen?

**AO:** Far shaxankii waagii dambe horta Cedar baan ku soo degay.

**AY:** Waan gartay, Cedar baad degtay. Cedar-Riverside.

**AO:** Riverside, waa 1991 kii fiiri.

**AY:** Qolyihii ugu horeeyey baad ahaydeen?

**AO:** Waa kaas.

**AY:** Imisa qof baa idin ka soo horeeyey baa u malaynaysaa?

**AO:** 9 qof baa naga soo horeeyey baladka dhanba.

**AY:** 9 qof baa idin ka soo horeeysay.

**AO:** Oo arday ah.

**AY:** Waa kuwii horeyu joogay.

**AO:** Waa kuwii horey u joogay yaah waa ardaydii arday bay ahaayeen. Dad la keenay ma jirin.

**AY:** Oh, dad la keenay ma jirin.

**AO:** Dad la kenay ma jirin.

**AY:** Dadkii ugu horeeyey waxaa la keenay '93 gii, haye.

**AO:** '93 gii haa. Hadee meeshaas baanu ku jirnoo waagaas meeshaas waxaa haystay madowga Mareykanka ah sartaas.

**AY:** Halkaasaad nolosha ka bilowday.

**AO:** Meel aad u daran bay ahayd oo daroogatada iyo balaayada iyo xumaanta ka socota yaah, aad bay u xumayd.

**AY:** Dad kale oo fara badanina waa deganaayeen laakiin.

**AO:** Xaafadana waxaa u badnaa dad Amxaaro iyo Oromo ah, yaah iyagaa u badnaa meesha, hal biibitaa jirtay halkaasaan isgu tagi jirnay Amxaarada iyo anaga Soomaalida ah.

**AY:** Intiina bariga Afrika ka timi.

**AO:** Intayada bariga Afrika ka soo jeedaa [qosol], meeshaa saaxiib baaba lagu noqday dadka oo dhami yaah, naag baa lahayd Eeritiriyaan ah oo nin cadaan ahi qabo, yaah naagtaasaytaa iska lahayd biibitada.

**AY:** Ma waxay ku taalaa oo ka soo hor jeedaa meeshii 400 ka goobta caweyska.

**AO:** Maya meesha oo tiyaartarka iyo lagu dhig dhigo.

**AY:** Waxaan u malaynayaa waa Cedar-Riverside Cultural Center.

**AO:** Hadee ma taqaanaa markii dambe, shaqo fiicanina ma jirin markaa oo waxaad iska helaysaa wax la yiraahdo maxaa la yiraahdaa Shaqooyinka warshadaha.

**AY:** Warshadaha shaqooyinkooda.

**AO:** Iyo shaqada baakinka barxadaha gaadiidka.

**AY:** Baarkinka barxadaha gaadiidka, haa.

**AO:** Shaqo baarkin ayaan helay markiiba.

**AY:** Aad ka heshay.

**AO:** Baladka hoose.

**AY:** Baladka hoose.

**AO:** Adigu waa ka shaqsheyn jiray waagii dambana urur beeleed ayaan iska caacaawin jiray dugsiga ka dib farshaxanka iyo waxaasayto, calaamadaha iyo balaayooyin kale.

**AY:** Goormaad ku soo noqotay far shaxankaagii aad ka tagtay.

**AO:** Markii dambe far shaxankii ayaan ku soo laabtay oo waqti dambe ayaan ku soo laabtay. Far shaxanku wuxuu u baahan yahay guri inaad meel fiican haysatid.

**AY:** In aad meel degtid.

**AO:** Haa, waa dhib badan tahay adigoon wax ba haysan in aad wax sameyso.

**AY:** Qalabkiina waa in aad haysataa.

**AO:** Qalabkiina waa in aad haysataa haa, marka waa dambe ayaan ku soo laabtay oo guri fiican degnay.

**AY:** Markaa waxaad xagaa kala timid ma jirto ee qalabka halkaanaad ka heshay.

**AO:** Halkaanaan ka helay. Qalabka waxaan ku bilaabay hadee waagaas lacag saas ah lama hayn, lacagta la qaataa way yareyd, Faadumana wa yyareyd waxay qaadanayso.

**AY:** Markaa maxaad ku bilowday?

**AO:** Marka waxaan sameyn jiray, aad bay u adkayd, yaah siiriyaal ka la cuno ma aragtay? Markii aad ka baxsatid Siiriyaalka oo aad dhameysatid. Santuukha uu ku jiro yaah. Intaan jeexo ayaa rinjiyen ku sameyn jiray.

**AY:** Waayo waxaadan haysan ma aragtay…

**AO:** Adigoon dhaqaale fiican haysan waa adag tahay, hadii lacagtii ay shaqeysato ama anigu shaqeysto cidii baa loo dirui jiray, markaa shaxaad qoysaska.

**AY:** Markaa waxa kan dee aad santuukha Siiriyaalka aad isticmaalaysid.

**AO:** Haa.

**AY:** Dee ma ahayn waxaa iib gelnayso ee aad cid ula tagayso ee waxay ahayd wax uu aad adigu maskaxdaada ku raali gelinayso.

**AO:** Maskaxdayda may, farshaxan fiican baa meesha ka soo baxay.

**AY:** Waa igu ciyaaraysaa.

**AO:** Walaahi bilaahi.

**AY:** Oo aad iib gaysay.

**AO:** Haa, oo aad yaabaysid.

**AY:** [qosol]

**AO:** Markaasaan gadaa oo hada gadaa o gadaa.

**AY:** Oo waa noocma wax ma ka haysaa hada? Kuwaasaanba doonayaa in aan arkee?

**AO:** Wax yar yar baa haray, yaah.

**AY:** [qosol] Dhul ay yaaliin ma garanaysaa.

**AO:** Wax yar yar baa haray.

**AY:** Hagaag.

**AO:** Halkoo miyaa mise labadoo miyaa ma aqaan, ilaa hadaan gadaayey.

**AY:** Dhawaan.

**AO:** Kuwaa wixii ka haray ilaa dhawaan waan gadanaayey.

**AY:** Markaa ma farsamo gooni ah bay kuu noqdeen, sdee bay ahaayeen.

**AO:** Haa, inataan jeex jeexo ma taqaan oo ka shaqeeyo oo ka dhigo afar gees, markaasaan waxaan galinaayaa ma taqaanaa jaldi ama gal yaah.

**AY:** Markaa wuxu ma rinjiyeyn baa mise waa wax kale?

**AO:** Waa rinjiyen, yaah.

**AY:** Intaad waday sheekadaas markaa?

**AO:** Sheekadaas waxaa waday cabaar baan waday si fiican baa loo gadaayey.

**AY:** Si fiican baa loo gadanaayey.

**AO:** Haa. [qosol] Soo yaab ma aha [qosol] ma garatay.

**AY:** [qosol] Maad ku noqotid o dib u bilowdid.

**AO:** Walaahi bilaahi ma sameyn karo. Waligay dad uma sheegin.

**AY:** Waaba mashruuc dhan.

**AO:** Aad iyo aad haa.

**AY:** Haa, fiiri qofu marku u dhib noloshiisa la kulmo. Maskaxdu way shaqeynin, waa in aad ka shaqeysiisaa waxyaaluu soo bixinaayaa, dhag.

**AY:** Marka goormaad qalabkii aad doonaysay oo dhan isu keentay?

**AO:** Markii dambe waa haelay qalabkii markaan meelo badan ka shaqeeyey dugsiyo iyo adigu dugsiyada ka dib iyo macalimiin aan badelaayey iyo oo Edina Elementary School iyo ma taqaanaa…

**AY:** Haa, haa. Awood baad u yeelatay.

**AO:** Apple Valley iyo dusgiyada kale.

**AY:** U heshay in aad qalabkaagii heshid aad ku shaqeyn jirtay.

**AO:** Haa awood baan u helay haa.

**AY:** Intee baad hada dadka far shaxankaaga yaqaana? Dadka ku yaqaanaana waa dadkee?

**AO:** Adigu waa.

**AY:** Yaa wax kaa iibsada?

**AO:** Soomaalidu hada dhow bay igu bilaabeen iney gataan, hada dhow.

**AY:** Haa, waa gartay.

**AO:** Wax saas ah ma aha. Horta hore aad baan isgu dayey in aad dhalin yarada aan.

**AY:** Aad ka qayb geliso.

**AO:** Aan ka qayb geliyo, far shaxanka iyo marka 1995 kii baa waxaan isku daynay aniga iyo xaaskayga Faadumo in aan bandhigyo far shaxaneed aan ka dhiibno dugsiyaadka.

**AY:** Waan gartay, waan gartay.

**AO:** Dhalin yarada 1996 meelahaasaysto.

**AY:** Waa gartay, intee in le'eg baad wadeen.

**AO:** Waxaan tagnay Dugsiga Saree Roosevelt High School, si fiican baa naloo soo dhaweeyey dhalin yaradii aad bay ula dhaceen. Waa yaabeen, waxaan u gaynay far shaxankaygii kaliya ma ahayn, rinjiyeyntii oo hidihii iyo dhaqanka Soomaalida ah baan u gaynay dhinaca kalena waxaa keenay hidihii iyo dhaqankii oo run ah, fandhaalkii magaciisigii war alaabtii baadiyihii oo dhan.

**AY:** Alaabtii oo caynkeedii ah qalabkii weel qorida oo dhan.

**AO:** Weel qoridii oo dhan baan meesha ku keenay.

**AY:** Iyo hidihii iyo wixii o dhan.

**AO:** Markaasay dhalin yaradii ka yaabeen oo waxay yiraahdeen war waxaan muxuu yahay? Ma yaqaanaan waxaasoo waa dad markaa la keenay 1993 gii.

**AY:** Labada dhinacba halkaana may soo gaarin dhankaana waa ka dhumeen.

**AO:** Haa dhankaana waa ka dhumeen, kuwaa iska ooyay oo yiri nalooma sheegin maxaa dhacay, tan iigu darnay waxay ahayd waagaas waxaa jiray macalimiin oo Soomaali ah, yaah.

**AY:** Haa.

**AO:** Oo xataa hal qof ii imaan xataa, yaah ma garatay.

**AY:** Haa.

**AO:** Waxay ka cabsanayaan in wadaadan ku so biiray Minneapolis in ay ma taqaanaa ay ku kacaan mindhaa.

**AY:** Haa, haa.

**AO:** Caruurtayaday far shaxan barayaan waa maxay waxaan gaaladaanayto.

**AY:** Haa, yaah

**AO:** [qosol] Yaah.

**AY:** Een markaa adiga farshaxankaagu ma mid gooni ah magacse ma leeyahay? Nimanka ugu magacayada waaweyn kuwo aad adigu ku dayataa ama aad higsataa ma jiraan?

**AO:** Aniga fa rshaxankayga.

**AY:** Maxaa la yiraahdaa horta.

**AO:** Mid wadankayagii ku dhashay ma aha, yaah wadankeena far shaxanku aad uma weyneyn, yaah.

**AY:** Waa gartay, waa gartay.

**AO:** Waxaa sheegayaa far shaxanka rijiyeynta. Sawir gacmeedyo iyo qorida waa jirtay.

**AY:** Far shaxanka.

**AO:** Haa, far shaxankaas oo dhan.

**AY:** Haa waa gartay.

**AO:** Wadanka waa jiray, wadanka sawir qorid bini'aadam la sawirkii la qoroyo.

**AY:** Haa.

**AO:** Iyo rinjiyeyn, wax ka jirtay wadanka laakiin saas wadanka wax aad loo yaqaan ma ahayn.

**AY:** Waan gartay.

**AO:** Dad yar baa sameyn jiray rinjiyeynta, laakiin waa rinjiyey ku kooban wadankeenii bas, ma aha dad oo aduunyadii la socda, ma garatay.

**AY:** Aduunkiina waxyaabo kale ayaa laga isticmaalaa.

**AO:** Iyagu aduunka kale lama socdaan waxay joogaan hoos, yaah.

**AY:** Markaa adigu maxaad isku daysaa in aad dhex dhexaadisid labadaba.

**AO:** Haa in aan dhex dhexaadiyo labadaba.

**AY:** Waayo?

**AO:** Oo aan tuso.

**AY:** Waayo sidii aad adiguba sheegaysay far shaxankaaga waxaa ka muuqda dhaqankii, xoolihii baa ka muuqda.

**AO:** Dhaqankaygii iyo habraackii hore oo waliba Yurubiya kii anigu Yurub baan wax ku bartay.

**AY:** Hanaanka aad raacdaa waa mid reer Yurub ah.

**AO:** Hanaankaygu waa Yurubiyan, yaah.

**AY:** Yurubiyanku markaa waliba Talyaaniga.

**AO:** Rinjiyeyntada iyo farsamadaydu waa reer Yurub, Faransiiska, Ingiriiska, Talyaaniga, waagaas horta ma jirinmeel kale, Talyaanigaa ugu horeeyey. Rinjiyeynta ugu fiican ee jirtay Talyaani bay ahaayeen. Sandiko, Joto, dadkaas o odhan iyo Garafaango.

**AY:** Uh-uuh, laga dambeeyo.

**AO:** Laga dambeeyo Yurubtaas dheer dheer ma jirin.

**AY:** Kuwo aad adigu ka dambayso oo mar marka qaar kood aad wax yar ka soo xad is tiraahdo waa kuwee. Mise waad og tahay in waxaagu adiga kugu kooban yihiin.

**AO:** Haa, aniga, markii ugu horeeysey wadanka markaan galay oo aan waqti badan joogay Yurub Talyaanigaan dhihi lahaa, waxaan ka yaabay oo aanay wadankaygii ku arkin yaa h oo saamayn ugu yeeshay wuxuu aha afar shaxankii la yaqaanay 1400 daadkii. Ayaa aad iigu weynaa kaasi qaraami buu ahaa.

**AY:** Oo Talyaanigaa lahaa.

**AO:** Haa Talyaani buu ahaa, laakiin kan 1800 kii yaah, niman la dhihi jiray Makayooli. Oo rinjiyeyntooda aad looga yaabay, oo aad u fiicnaa kooxdaas ayaan raacay, yaah waqtiyo waxaa jiray aan kooxdaas ahaa.

**AY:** Uh-uuh, markaa kan aragtida ee muuqaaka miyaa ku soo jiidan jiray mise waadna akhriyi jirtay?

**AO:** Waxa I soo jiitay sida dadlaasi u isticmaaleen midabka.

**AY:** Midabka.

**AO:** Waxay ahayd wax qayrul caadi ah.

**AY:** Markaa had iyo jeeraale ma waxaad isku darijirtay in aad iyada raacdo?

**AO:** In aan iyaga camal noqdo.

**AY:** Markaad aragtid wajiyadooda ayaad in aad ka qishto…

**AO:** Waad garatay, waad garatay, kii iigu horeeyey waxaa weeye. In aan raadiyo in aan Makayooli noqdo oo sidoodii wax u masawiro, waagii dambana waa ka leexday anigaa isku dayey in aan wax sameyso, laakiin gudahuu iiga jiraa ma dhamaan karo.

**AY:** Haa, ma is ogayd, ma ogaan baa ahayd oo waxaad is leedahay labada isku darso, mise waad. is tiri…

**AO:** Waxaan is iri habraacoodii. Ay wadankooda ku isticmaaleen.

**AY:** Haa, kaagii ku darso.

**AO:** Kaygii ku sameey ma garatay? Wadankaagii…

**AY:** Ileyn koodiina waa aragtaye.

**AO:** Waan arkay, yaah.

**AY:** Meeshii aad ka timid iyo tacliinteediina waa aad leedahay.

**AO:** Tacliintii iyo wixii oo dhan waa leeyahay. Jile ayaa yimid, iayagiina ma garatay. Ayaa yimaadeen, dadkaan qaraamiga ahi waa rinjiyeeyeyaal sax ah, sidii la rabay ayey wax walba u sameynayaan. Dadkaani marka Jileyaal ah qaraamigiina ma aha, Makayooligii markaasay siday u arkaan wax u sameynayaan. Kuow Jileyaahsa ahi waaba ka sii dareenba, iyagana dad yaab leh.

**AY:** Uh-uuh.

**AO:** Marka een dadkaas baan raacay markii dambe si aan aniga rinjieyeynta u sameeyo kii wadankaygii yaah baan ku sameeyey.

**AY:** Haa, haa, waa waxyaabaha ay aniga igu soo jiitaan waxaa weeye, miyina waan ku dhashay miyigii markaan ku arko, magaalooyinkii marka ana ku arko Xamar Jajab aan ka dareemo.

**AO:** Xamar Jajab camal.

**AY:** Hobyo xataa in kastoo aynaan labadeenuba arkin, macnaha magaalooyinka waaweyn ee qadiimiga ah.

**AO:** Haa.

**AY:** Iyo tan dee casriga ah ee laftirkeeda markaad labadaba waad ka dhadhansanaysaa.

**AO:** Haa.

**AY:** Labadaba waa arkaysaa dhexdhexaadinaysaa labadiiba in aad dhaqankii wadid waad arkaysaa, taa waad ugu tala gashay.

**AO:** Waan ugu tala galay.

**AY:** Cid kula wadaagta far shaxanka oo Soomaali ah oo aad isku xiran tihiin oo koox ahi horta ma jiraan, mise waa kaligaa, magaalada aynu joogno?

**AO:** Magaalada aan degan nahay, maya meelo kale way jiraan.

**AY:** Meelo kale oo xagee ah dee?

**AO:** Wadamada kale ee ma garatay, Canada, Soomaali baa joogta aad u sameeya rinjiyeynta oo aad u fiican.

**AY:** Dhowr imisa qof baad taqaanaa, labo meelahaas?

**AO:** Dad badan kama aqaani.

**AY:** Laakiin waa maqashay?

**AO:** Iyo nin jooga Seattle isagana rinjiyeeye weeye.

**AY:** Haye.

**AO:** Laakiin isku koox ma nihin isku sina wan uma rinjiyeeyno. Kuwaasna isku rinjiyeyn ma nahin oo dhinacaas yaah.

**AY:** Canada, haa.

**AO:** Toronto iyo Ottawa aa wiil degan yahay aan isu dhow nahay.

**AY:** Haa, ma wada xirrirtaan ma is taqaaniin?

**AO:** Kan Ottawa waa xiriirnaa, waa nin fiican.

**AY:** Saad isku barateen?

**AO:** Kuwo kale ma aqaani, laakiin Soomaali badan waa jiraan oo rinjiyeyn fiican yaah.

**AY:** Wax urur ah oo idinka ka dhexeeya ma jiraan?

**AO:** Saan baa fiicnaan lahayd? Ma ogi aniga, waa in aan la xiriiraa.

**AY:** Een, hada magaaladatan aynu joogno ama gobolkan aynu joogno, Minneapolis.

**AO:** Waxna ma joogaan, qof ma joogo, wiil baa jooga laakiin asaga rinjiyeyntiisii waa kii hore oo Soomaalida oo hore.

**AY:** Haa, kii ma taqaanaa xayawaanka u badnaa.

**AO:** Wixii Soomaalida oo reer baadiyihii.

**AY:** Ee awryaashii.

**AO:** Isaga laakiin nin o midabeyn iyo ma ahaa.

**AY:** Midabkii baa ka maqan.

**AO:** Laakiin waa nin fiican weeye.

**AY:** Midabkii baa baa ka maqan.

**AO:** Midabkii wuu sameeyaa, adigu shaqo badan bay u baahan tahay.

**AY:** Haa, wax u baahan tababar.

**AO:** Haa, wuxuu u baahan yahay tacliin.

**AY:** Tacliin buu u baahan yahay.

**AO:** Waxaa ka maqan qaybtii qaybtaasaa ka maqan.

**AY:** Kaa qaybtii buugaa ka maqan.

**AO:** Oo ah taariikhda far shaxanka.

**AY:** Waa gartay baa k amaqan.

**AO:** In u ma taqaanaa u usi fiican u galo, oo uu u barto.

**AY:** Waxaan ku soo dhow nahay, xiligii aanu gaba gabayn lahayn markaa marka aad eegtid oo aad qiimeysid oo guud ahaan aanu far shaxanka aanu ka baxno, dadka jooga gobolkan ama magaaladan aynu joogno ee Soomaalida ah maxay kuula eg tahay in aanu meesha ku soo kordhinay ama aynu…

**AO:** Intii aynu taas gelin.

**AY:** Waxaan sameeye waxyaalo badan oo xaga rinjiyeynta Minneapolis.

**AO:** Oo ka mid ahaa ma taqaanaa sawir gacmeed aan u sameeyey Global Arts, Global Market.

**AY:** Haa, haa.

**AO:** Waa aragtay soo ma aha.

**AY:** Haa, waa arkay tan weyn, tan weyni intee haa waxyaabahan iloobay taa baa ka mid ah.

**AO:** Taasaa ka mid ah.

**AY:** Intee bay ku soo jiiday ogaal iyo dad kaala hadlay iyo dad intee le'eg baad isku barateen?

**AO:** Horta taasi waxay ku bilaabantay…

**AY:** Haa, sheekadeedu xagee bay ka timid?

**AO:** Anigoo aanba ka war qabin baa Xuseen Samantar wuxu uyiri waxaa noo timid warqad la dhahaayo beesha qofkii far shaxanle ah, waxaa jira tartankaaneeyto ka qayb galka, yaah.

**AY:** Sannadkee bay ahayd?

**AO:** Adigu uun saa uma badnayn, waxay ahayd 7 sanno meelahaas yaah.

**AY:** Haa 7 sanno ka hor.

**AO:** Haa 7 sanno ka hor, bas markaa ma ka qayb galaysaa buu dhahay, markaa haa, hagaag baan iri, warqadii iyo wixii buu ii sameeyey, beel kastaba waxaa jira dadka Hindida ah ee halkan loogu yimid, waxaa jira kuwa kale.

**AY:** Qolo walba qof baa laga keenay.

**AO:** Qolo walba qof baa laga rabaa laakiin waa dad badan oo ha dhow baa qof laga dooranayaa dadkaas. Qofkii la rabo, ma garatay.

**AY:** Haa wax baa laga soo baxayaa.

**AO:** Wax baad keenaysaa.

**AY:** Tartan.

**AO:** Tartan, alaabtii baad keenaysaa naqshadeyntii iyo wixii aad sameynasid, warqado yaah, qofkiiba ma taqaanaa 5 iyo 6 warqadood oo waaweyn oo aad naqshadeyn ku sameysay wixii bay dooranayaan. Ma garatay?

**AY:** Waan gartay.

**AO:** Markaas waa la I doortay, hagaag bay noqotay laakiin naago xun baa meesha ka shaqeynaayey dad yaah si fiican kuuguma sheegayaan wax. Waxay dhaheen ma jeclaan lahayd qof kula shaqeey? Hagaag baan dhahay, qof oo I caacaawiyaan u malaynaayey ma og tahay. Illeyn hoostay rabeen in ay iga soo geliyaan nin Afrikaan Mareykanka ah. Aniga waa iska aqbalay, wiil adiga nin aan yareyn, hagaag baan dhahay naqshadahii iyo rinjiyeyntii iyo wixii dhan ba ala ii bilaabay, ninkaan maaskarayaal buu ii keenay oo sameynaayaa.

**AY:** Waa gartay.

**AO:** Waa garan waayey xaalada, naagihii baan wacaa oo la hadlaa may may, sheekadii waxay noqotay yaana war kugu daalin in ninkii ma taqaanaa, yaah.

**AY:** Haa.

**AO:** Uu ma taqaanaa u shaqadi aan sameynaayey uu ila qaybsadaba yaah.

**AY:** Waa yahay, waa yahay.

**AO:** Ma garatay. [qosol] Wixii aan heli lahaa in uu nus ka qaato isagii in ay beeshaasayto ay ka farxiyaan oo yiraahdaan meel oo tartan ah baan ka qayb gelinay. Hadee qaylo qaylo iyo waxay taraysaa ma jirto.

**AY:** Haa.

**AO:** Meeshaan iyagaa xukuma haysta yaah.

**AY:** Waa gartay, farahaad ka qaaday.

**AO:** 4 bilood bay ugu qaadatay in aan sameyno.

**AY:** Adiga iyo asagu.

**AO:** Anigaa sameeynaayey kuligiis afartoo xabo, shan miyaa uu maaskarayaal galgaliyey, yaah ma garatay. Yaah, taasi waa mid oo waan sameeyey, midna waxaa weeye Pillsbury Neighborhood. Aan u sameeyey, dhalin yarada iyagana waxaa u sameeyey sawir gacmeed. Sawir gacmeed kalena waxaan u sameeyey Global Market ka, ma garatay, waxyaalo bad badan baan saa saa u sameeyey.

**AY:** Markaa iminka waxoogaa bahda far shaxanku xiriir ma leedihiin ma lagu yaqaanaa?

**AO:** Kuwee weeyana?

**AY:** Dee cidan kuwan waxaan uga jeedaa, marka la yiraahdo dee iminka qolooyinkaas far shaxanka macnaha.

**AO:** Kuwo o ola yiraahdo oo Minnesota Ars Board. Kuwaaseeyto iyo waa I yaqaanaan waxayna na siiyeen Garaantiyo badan.

**AY:** Dhow garaanti baa la idin siiyey.

**AO:** Hadana mid baa noo maqan o aan u malaynayaa in nala siinayo.

**AY:** Oo markaa yaa kula shaqeeya adiga? Ayaa kula shaqeeya? Kaligaa weeye miyaa?

**AO:** Nin u dhashay wadanka Chad oo aan saaxiib nahay.

**AY:** Markaa istuudiyo yar waa leedahay.

**AO:** Waa far shaxamayste isaguna.

**AY:** Isagu.

**AO:** Haa waa far shaxan yaqaan.

**AY:** Meel miyaa idiin furan.

**AO:** May.

**AY:** Haa.

**AO:** Intu deganaan jiray, wuu yimaadaa wuuna tagaa, wuuna soo laabtaa Florida ayuu degan yahay.

**AY:** Florida.

**AO:** Haa, qabowgaan buu ka cararay miskiinku [qosol] qabowgaanayto ma joogi karo bu yiri. Isku koox baan nahay wada shaqeysa.

**AY:** Haye.

**AO:** Aniga iyo asagu.waa cararay.

**AY:** Haa. Markaa sidee baad tihiin dhaqaale ahaan ma tijaar baad tihiin mise bariiska uun baad la soo baxdaan mise?

**AO:** Bariiskaaga uun baad la soo baxaysaa, waa shaqadaada taajir ma jiro meeshan.

**AY:** Haye.

**AO:** Meeshaan waa lagu qoslaayaa waxaa la yiraahdaa Minnesota dii wacnayd [qosol] ha ku dhihin taas dhagaha heysan gashanine yaah.

**AY:** Haye, Minnesota dii wacnayd [qosol] tan laftirkeedu waa ayu tagaysaaye.

**AO:** Waa u tagaysaa miyaa. [qosol]

**AY:** Markaa hadii aanu kusoo gaba gabayno maxaad u malaynaysaa sidee bayni nahay hada hadii lagu yiraahdo Soomaali qiyaas, xaalka ama heerka waxa ay Soomaalidu halkan ka qabsatay ee ay galbatay, hadaad cid u sheegayso maxaad oran lahayd?

**AO:** Xaga far shaxankaa?

**AY:** Dhinac walba, dhinac walba.

**AO:** Mise nolosha.

**AY:** Maxaad oran lahayd Soomaalida halkan ma dad wax ka qabsaday baa?

**AO:** Maya, maya hada, horta hore shaqo la'aantu aad bay u badan tahay,markii Soomaalida xagaa loo fiiriyo. Aad iyo aad shaqo saas ah ma ay haystaan. Laakiin dad waxaa jira iska roon. Sidii hore camal 1991 kii yaah waa la baa'basanaa.

**AY:** Haa, xagee baad ka malaynaysaa dhulkee baad ka malaynaysaa in aynu ka ladan nahay?

**AO:** Soomaalida badanaa waxaan ka ladan nahay dhanka ururada samafalka ah, meeshaas weeye meesha wax laga helaa, ma garatay?

**AY:** Tacliinta iyada sidee ayeynu ku nahay.

**AO:** Tacliinta waa iska yaah, saas uma weyna tacliinta meeshatan Soomaalida adigu kuleejyaalka way ku jireen way ka baxeen laakiin yaah adi dad oo tiyaataryaal iyo magaciisiyaal iyo ma soo bixin ma garatay.

**AY:** Uh-uuh, maxaad u malaynaysaa in 20 sanno xageynu marayno?

**AO:** Horta dhaln yarada…

**AY:** Rajo ma aragtaa.

**AO:** Waxaas o odhan rajadu waa dhalin yarada, jiilka soo kacaya. Jiilka soo kacayaa hadii ay si fiican wax u bartaan. Dad fiican baa ka soo baxaaya.

**AY:** Ma aragtaa wax wax baranaya?

**AO:** Dhalin yaro wax bartay waa joogaan aad bay u fiican yihiin, waa jiraan yaah.

**AY:** Uh-uuh, Cabdicasiis waxa aynu soo gaarnay gabo gabadii marka aad wa kale oo aan ka tagay aad ku daraysid.

**AO:** Yaah.

**AY:** Oo iminka hadeerto kuu muuqda, wax fara badan waynu ka tagnay kolkayba, laakiin wax aad u malaynaysid in aynu.

**AO:** Yaah.

**AY:** Cid la qaybsano, ama su'aal aan ku waydiiyey.

**AO:** Maya waa dhamaystay baan u malaynayaa su'aal yaashaydii.

**AY:** Aad iyo aad baad u mahadsan tahay.

**AO:** Yaah, adaa mudan yaah.